ISBN: 978-9914-700-42-8
9 789914 700428

# AASAASKA DIINTEENNA

## The Foundation of Our Faith

### A Christian Catechism in Somali



This is an amazing catechism and I am very pleased with its quality. This book will positively contribute to the written resources of the Somali Church. This catechism will be a blessing to many seekers and believers alike.

***Bashir Muse***
***Elder, Somali Christian Ministry Scandinavia***

Aweis A. Ali

# AASAASKA DIINTEENNA

## The Foundation of Our Faith

A Christian Catechism in Somali

Aweis A. Ali

Maandeeq Publishing

Published by
Maandeeq Publishing
Nairobi, Kenya.

First Edition, 2020

This license lets you distribute, remix, tweak, and build upon this work,
even commercially, as long as you credit Aweis A. Ali for the original creation.

Aayadaha Kitaabka Quduuska ah waxaa laga soo qaatay
Kitaabka Quduuska Ah © Society for International Ministries, 2008

ISBN: 978-9914-700-42-8

The author can be reached at:
***amazingwisdom@gmail.com***

# TUSMADA BUUGGA

*Dedication* ........ *vii*

I. Hordhac ........ 1

II. Qirashada Iimaanka ........ 4

III. U ducaynta kuwa Eebbe u adeega ........ 5

IV. Baryada Rabbiga ........ 7

V. Sabuurkii Nebi Daa'uud ........ 7

VI. Tobanka Amar ee Nebi Muuse ........ 8

# What others said about the catechism

*This catechism is a game changer; I wish it had been available to me during my active years of ministry. I am certain this catechism will be a blessing to the Somali church for many generations to come.*

**Rev. Shaafi'i Ibraahim Faarah**
**A retired Turf Missionary**
**Africa Inland Church, Kenya**

*Aasaaska Diinteenna is a book which should be a constant companion of every Somali Christian. This catechism helps the Somali Christians to better understand the basics of our faith. It is also a reliable source for apologetics. I highly recommend this catechism to any faithful believer or serious seeker.*

**Rev. Mahad Hillow Birik, BTh., MA**
**Pastor, Reformed Church of East Africa and**
**Chairman of Somali Believers Mission Network**

*This is an excellent catechism which would help believers and seekers alike. The first part of the catechism is in prose and is written in a question and answer format; the second part is in poetry. This is the first catechism ever written in Somali. We highly recommend it to believers, seekers and those involved in the Somali ministry, whether expats or nationals.*

**Shania & Shino Gabow**
**Somali Christian Media Ministries**
**East Midlands, UK**

*This is an amazing catechism and I am very pleased with its quality. This book will positively contribute to the written resources of the Somali Church. This catechism will be a blessing to many seekers and believers alike.*

**Bashir Muse**
**Elder, Somali Christian Ministry**
**Scandinavia**

*I am extremely thankful to God's guidance in leading Aweis to write such a foundational and culturally relevant book. It is foundational in that it answers basic doctrinal questions and most inquiries by seekers and new believers in a concise manner with scriptural reference. In this regard, it prepares the believers to give a reason for the hope we have in Christ. It is culturally relevant in that it uses poetry to raise and answer common objections to the faith as well as encourage the believer to enjoy the abundant life in Christ.*

*We live in a season where we see more Somalis coming to faith in Christ and many of our people are becoming more exposed to the Christian faith. Our desire is to see a body of believers rooted, built up and established in Christ. This book is a well thought out and much needed resource that will help the body of believers grow in Christ.*

*This book is also a great encouragement to the Somali believers, as it is indicative of progress and growth among us. May God continue to raise more men and women like Aweis to produce resources for this generation and beyond.*

**Pastor Abdikamil Mahmoud (Abdi Walalo)**
**Elder, Fellowship Baptist Church, Mombasa, Kenya**

# DEDICATION

This catechism is dedicated to the late Aadan Jim'aale Faarah, a renowned church leader, Bible translator and hymnologist.

1. Immisa ilaah ayaa jirta?
2. Maxaa loola jeedaa Seddaxmidnimada?
3. Maxaad iiga sheegi kartaa Eebbaha Aabbaha ah?
4. Wax ma iiga sheegi kartaa Sayid Ciise Masiix?
5. Ruuxa Quduuska ah maxaad iiga sheegi kartaa?
6. Astaamaha Eebbe maxaa ka mid ah?
7. Yaa abuuray adduunka?
8. Eebbe wax kasta miyuu og yahay?
9. Waa kuma Ibliisku?
10. Waa maxaay Kitaabka Quduuska ahi?
11. Kitaabka Quduuska ahi muxuu ka kooban yahay?
12. Yaa qoray Kitaabka Quduuska ah?
13. Wax miyaa lagu dari karaa ama laga dhimi karaa Kitaabka Quduuska ah?
14. Maxaa loola jeeda erayga "Injiil"?
15. Eebbe muxuu Aadan ka abuuray?
16. Eebbe muxuu ka abuuray Xaawa?
17. Eebbe muxuu u abuuray dadka?
18. Sidee ayaan u sharfi karnaa, u weheshan karnaa, xiriir ula yeelan karnaa una caabudi karnaa Eebbe?
19. Halkee ayey Adan iyo Xaawa ku noolaayeen markii hore?
20. Muxuu Eebbe uga eryey Aadan iyo Xaawa Beertii Ceeden?
21. Waa maxaay dembi?
22. Ma jiraa qof aan dembi lahayni?
23. Dhib intee la'eg ayaa ka dhashay dembigii Aadan iyo Xaawa iyo keennaba?
24. Sayid Ciise Masiix weligiis miyuu dembaabay?
25. Eebbe muxuu sammeeyey si uu u sugo badbaadadeenna?
26. Sidee ayaynu ku heli karnaa badbaado?
27. Maxaa loola jeedaa in aan u rumayno Sayid Ciise Masiix in uu yahay Badbaadiyaheenna?
28. Badbaadadeenna ma shaqaysan karnaa haddii aan la nimaadno camal wanaagsan?

29. Sidee ayaan dembiyadeenna cafis ugu heli karnaa haddaan nahay mu'miniin?
30. Haddii ay badbaadadeenu tahay deeq Eebbe oo nimco ah oo aanan innagu shaqaysan karayn, weli miyaa la inaga doonayaa in aan la nimaadno camal wanaagsan?
31. Waa maxaay quduusnimo?
32. Ruuxa Quduuska ahi muxuu sameeyaa si uu u caawiyo mu'miniinta?
33. Waa maxay salaaddu?
34. Waa maxay kiniisad?
35. Sidee ayaa kiniisadda Eebbe loo taageeraa?
36. Waa maxay baabtiisku?
37. Waa maxay Cashada Sayidku?
38. Yaa ka qayb qaadan karaya Cashada Sayidka?
39. Qof Masiixi ahi ma guursan karaa qof aan Masiixi ahayn?
40. Maxay noqon qofkii Masiixi noqdaa laakiinse aan weli qofkii ay is qabeen weli rumaysan Masiixa?
41. Ka warran haddii xaaska aan Masiixiga noqon uu iskiis isaga tago?
42. Faa'iidoyinka guurka maxaa ka mid ah?
43. Guur cayn kee ah ayaa Eebbe ugu talo galay dadka sida ku cad Kitaabkiisa?
44. Ninkii isagoo hal xaas ka badan leh noqda Masiixi, miyuu furayaadhammaan oo uu la harayaa tii ugu horaysay oo keliya?
45. Jacayl caynkee ah ama intee la'eg ayuu ninku jeclaanayaa xaaskiisa?
46. Xaasku sidee ayay ninkeeda  u jeclaan kartaa una sharfi kartaa?
47. Sidee ayaa loo dhawri karaa guurka si reerku u liibaano?
48. Kiniisaddu miyey baabtiisi ninkii leh hal xaas ka badan ee noqda Masiixi?
49. Kiniisaddu ma u ogolaanaysaa in Masiixi leh hal xaas ka badan uu ka qayb qaato Cashada Sayidka?
50. Kiniisaddu ma howl gelin kartaa mu'min leh hal xaas ka badan kaasoo Eebbe ugu  yeeray in uu Sayidka si buuxda ugu adeego?
51. Maxaa lagu samayn mu'minkii naag labaad guursada isagaa oo hore xaas u lahaa?
52. Kitaabka Quduuska ahi muxuu ka leeyahay macsida?
53. Kitaabku muxuu ka qabaa balwadaha?

54. Kitaabku muxuu ka qabaa furniinka?
55. Maxay tahay xuquuqda waalidku ku leeyihiin caruurtooda?
56. Maxay tahay xuquuqda caruurtu ku leedahay waalidka?
57. Maxay tahay xuquuqda derisku?
58. Cafinta muxuu ka yiri Kitaabku?
59. Cadawgayga xitaa ma in aan cafiyo ayuu Eebbe iga doonayaa?
60. Eebbe miyuu innaga doonayaa in aan deeqsi ahaano?
61. Muxuu Eebbe ka yiri in dhaqaale ahaan la teegeero qoyska iyo qaraabada?
62. Sideen u bixinnaa sadaqada ama deeqda?
63. Masiixa wanaagsan ee ehelka u ah Eebbe ka cabsiga maxaa lagu gartaa?
64. Ma suurtagal baa in la ahaado Masiixi wanaagsan balse aan laguugu cadaadin caqiidadaada ama aan siyaabo kale aan laguu silicin sababo la xiriira quduusnaantaada?
65. Soon iyo salaad caynkee ah ayuu Eebbe raali ka yahay?
66. Eebbe muxuu dadka ka abuuray?
67. Waa maxay towbad sideesa ayay wax tar u leedahay?
68. Kitaabku muxuu ka leeyahay shaqada?
69. Eebbe muxuu ka yiri beenta?
70. Ma culimada oo keliya ayay tahay in ay diinta faafiyeen mise Masiixiyiinta oo dhan ayaa taas laga doonayaa?
71. Xaggee ayuu haatan ku sugan yahay Sayid Ciise Masiix?
72. Maxay dadku mudan geerida kadib?
73. Waa maxay janno?
74. Waa maxay naartu?
75. Sidee ayay Masiixiyiintu ku noqdeen caruurtii Eebbe?
76. Waa maxaay nuxurka Tobanka Amar ee Eebbe?
77. Sayid Ciise Masiix miyuu soo laaban doonaa?
78. Goormee ayuu Sayid Ciise Masiix soo laabana doonaa?
79. Sayid Ciise Masiix muxuu samayn doonaa marka uu soo laabto?
80. Sidee ayaan isugu diyaarin karaa soo laabashada Sayid Ciise Masiix?

81. Calaamado caynkee ah ayaa muuqan doona marka soo laabashada Sayid Ciise Masiix soo dhawdahay?
82. Uunka Wada Gaara
83. Injiil
84. Barakeysan
85. Towbad
86. Jaahilaa Lumay
87. Quduusnimo
88. Xog Warran
89. Cajabayey!
90. Faa'iido Maleh
91. La'eed
92. Laruuro
93. Runlow
94. Yimid Masiixii
95. Badbaado
96. Markii Hore
97. War Miisaan Leh
98. Nasiib Maleh
99. Adi Wanaagaaga

# HORDHAC

*Aasaaska Diinteenna* wuxuu maankayga ka guuxayay muddo aad u dheer waayo waxaan ogaa faa'iidada uu u yeelan karo Kiniisadda Soomaaliyeed ee ku sugan dal iyo dibadba. Masiixiyiinta Soomaaliyeed iyo kuwa aan weli raacin Sayid Ciise Masiix ee xaq doonka ah sida badan ma helaan qoraalo ku saabsan diinta Masiixiga oo lagu curiyay af-keenna hooyo. Buugaag iyo xogo badan way jiraan oo laga soo turjumay luqado kale loona turjumay afka Soomaaliga balse farqi wayn ayaa u dhexeeya buug lagu qoray af-Soomaali iyo mid loo soo turjumay.

Aniga oo garanaya baahida ballaaran ee loo qabo buuggan oo kale ayaan guntiga dhiisha isaga dhigay oo aan Eebbe talo saartay. Dadaalkii waan ku guulaystay maantana waxaad akhriyaysaa buug aan noociisaba weligiis lagu qorin afkeenna hooyo kaas oo xambaarsan waxbarid weyn. Buuggani waxaa uu kobcin doonaa cilmiga caqiidadeed ee Soomaalida Masiixiyiinta ah. Waxaa kale oo uu buuganni haddiyad qaali ah u yahay dadka aan Masiixiyiinta ahayn balse doonayaa in ay wax ka ogaadaan nuxurka caqiidada xerta Sayid Ciise Masiix. Labada qolaba waxaan ugu hambalyaynayaa akhrinta buuggan qiimaha sugan leh.

Waxaa kale oo aan rejaynayaa in buugganni dhiiri gelin muuqata u noqdo Soomaalida Masiixiyiinta ah oo ay afka hooyo ku qoraan buugaag iyo maqaalo badan oo ku salaysan Masiixiyadda si ay ugu faa'iideeyaan jiilka iminka jira iyo kuwa imman doonaba. Waa lama huraan in culuuun badan oo ku saabsan Masiixiyadda lagu qoro afka Soomaaliga si ay Kiniisadda Soomaaliyeed u noqoto mid awood iyo bisayl leh oo dhan walbaba ka dhisan ahna iftiin ay Soomaali oo dhammi ku soo hirato kuna xasisho.

Maahmaah Soomaliyeed ayaa ahayd, "hadal nin badiyay ma wada dhammayn oo kii yareeyayna kama wada tegin." Haddaba aniga oo soo koobaya hordhaca buuggan ayaan u ducaynayaa dhammaan akhristayaasha in Eebbe uga dhigo buuggan mid ay kawada faa'iidaystaan oo cilmigooda iyo caqiidadooduba mahadiso. Waxaa kale oo aan u mahadnaqayaa dadka Masiixiyiinta ah ee tirada badan ee isugu jira sokeeye iyo shisheeye ee muddada dheer igu dhiirigelinnayay in aan wax u qoro Kiniisadda Soomaaliyeed oo aan uga tago dhaxal muuqda oo loo aayo.

Nabad iyo caano

**Aweis A. Ali**

# QAYBTA 1AAD

## Tiraab iyo Toosnaan

# II

## QIRASHADA IIMAANKA

Waxaan rumaysannahay Eebbaha Aabbaha ah
Kaas oo ah Qaadirka abuuray samada iyo dhulka
Iyo Ciisa Masiix oo ah Inankiisa qura iyo Sayidkeenna
Kaas oo ka dhashay Ruuxa Quduuska ah
Waxaana dhashay Maryan oo bikra ah
Waxaa uu ku hoos silcay Bontiyos Bilaatos
Iskutallaabta ayaa lagu qodbay, wuu geeriyooday, lana aasay
Wuxuu galay Goobtii Dadka Geeriyooda
Kuwii dhintay ayuu ka soo sarakacay maalintii seddaxaad
Wuxuu aaday samada oo uu ku negaaday isaga oo ku sugan
Gacanta midig ee Eebbaha Aabbaha Qaadirka ah
Halkaas ayuuna ka iman doonaa si uu u xukumo
Kuwa nool iyo kuwa dhintayba.
Waxaan rumaysannahay Ruuxa Quduuska ah
Kiniisadda Ciise Masiix ee caalamiga ah
Jameecada awliyada ah, cafinta dembiga
Sarakicidda jirka iyo nolosha weligeed ah

**Waxaa Turjumay Aweis A. Ali**

## III

## U DUCAYNTA KUWA EEBBE U ADEEGA

Eebbow Ilaahow, kuwa aad u yeertay
In ay Eraygaaga, Soomaalida u geeyaan
Ku adeecay adigee, ammarkaaga raacay
Howshu waa mid adagoo, sahal aan ahayne
Afka waxay ka doonaan, uurka uga baahdaan
Eebbow Allaw sii, waa addoomadaadii

Agab waxay u baahdaan, yaaney waayin Eebbow
Ka ilaali cuduroo, caafimaad adigu sii
Cidla yaanay aragoo, abidkood ay cishoon
Ehel iyo axsaab sii, halkii ay tagaanba
Afka markay furayaan, hadal adigu oo hag
Axadkii maqlaaba, ha raaco Injiilka

Kuwa Eraygaaga, raaca oo rumeeya
Oo towbad keena, bartana Injiilka
Waa xertaadi adigee, garabkood Allow gal
Ka xijaab shar oo idil, oo ku xooji Ruuxa
Miro badan Allow sii, ku addeeca adigoo
Eraygaaga baraya, Soomaali oo idil

**Waxaa curiyay Aweis A. Ali**

# IV

## BARYADA RABBIGA

*Matayos 6:9-13*

Aabbahayaga jannada ku jirow, magacaagu quduus ha ahaado. Boqortooyadaadu ha timaado, doonistaada dhulka ha lagu yeelo sida jannada loogu yeelo. Kibis maalin nagu filan, maanta na sii. Oo naga cafi qaamahayaga sidaannu u cafinnay kuwa noo qaamaysan. Oo jirrabaadda ha noo kaxaynin, laakiin sharka naga du. Waayo, boqortooyada iyo xoogga iyo ammaanta adigaa leh weligaa. Aamiin.

# V

## SABUURKII NEBI DAA'UUD

*Sabuur 23:1-6*

Kanu waa sabuur Daa'uud tiriyey.
Rabbigu waa adhijirka i jira; waxba u baahan maayo.
Wuxuu i fadhiisiyaa doog qoyan dhexdiis,
Oo wuxuu ii hoggaamiyaa biyaha deggan dhinacooda.
Naftayda wuu soo celiyaa.
Oo magiciisa aawadiis wuxuu igu hor kacaa waddooyinka xaqnimada.
In kastoo aan ku dhex socdo dooxada hooska dhimashada,
Sharna ka baqi maayo, waayo, waad ila jirtaa,
Ushaada iyo hangoolkaaga ayaa ii raaxeeya.
Cadaawayaashayda hortooda waxaad iigu diyaarisaa miis,
Oo saliid baad madaxayga ku subagtaa, koobkayguna waa buuxdhaafaa.
Hubaal cimrigayga oo dhan waxaa i raaci doona wanaag iyo naxariis,
Oo weligay guriga Rabbiga ayaan degganaan doonaa.

# VI

## TOBANKA AMAR EE NEBI MUUSE

*Baxniintii 20:3-17*

Aniga mooyaane ilaahyo kale waa inaanad lahaan.

Waa inaanad samaysan sanam xardhan, ama wax u eg waxa samada sare jira, ama waxa dhulka hoose jira, ama waxa biyaha dhulka ka hooseeya ku jira. Waa inaanad iyaga u sujuudin, ama u adeegin, waayo, aniga oo ah Rabbiga Ilaahaaga ah waxaan ahay Ilaah masayr, oo xumaantii awowayaasha waxaan soo gaadhsiinayaa carruurtooda tan iyo farcanka saddexaad iyo kan afraad oo kuwa i neceb, oo waxaan u naxariistaa kumanyaal ah kuwa i jecel oo amarradayda xajiya.

Waa inaanad magaca Rabbiga Ilaahaaga ah si been ah ugu hadal qaadin, waayo, Rabbigu eedlaawe u haysan maayo kii magiciisa si been ah ugu hadal qaada.

Xusuuso maalinta sabtida, inaad quduus ka dhigto. Lix maalmood waa inaad hawshootaa, oo aad shuqulkaaga oo dhan qabsataa, laakiinse maalinta toddobaad waa maalin sabti u ah Rabbiga Ilaahaaga ah, oo waa inaanad shuqul qaban, adiga, ama wiilkaaga, ama gabadhaada, ama addoonkaaga, ama addoontaada, ama xoolahaaga, ama qariibka irdahaaga ku jira; waayo, Rabbigu lix maalmood buu ku sameeyey samada, iyo dhulka, iyo badda, iyo waxa dhexdooda ku jira oo dhan, kolkaasuu nastay maalintii toddobaad, sidaas daraaddeed ayaa Rabbigu u barakeeyey maalintii sabtida ahayd oo quduus uga dhigay. Aabbahaa iyo hooyadaa maamuus, in cimrigaagu ku dheeraado dhulka Rabbiga Ilaahaaga ahu ku siiyo.

Waa inaanad qudh gooyn.

Waa inaanad sinaysan.

Waa inaanad waxba xadin.

Waa inaanad deriskaaga marag been ah ku furin.

Waa inaanad damcin guriga deriskaaga, waa inaanad damcin naagta deriskaaga, ama addoonkiisa, ama addoontiisa, ama dibigiisa, ama dameerkiisa, ama waxa deriskaagu leeyahay oo dhan.

1. **SU'AAL:** Immisa ilaah ayaa jirta?

**JAWAAB:** Waxaa jira hal Eebbe oo xaq ah oo wixii ka soo haraa Eebbahaas runta ahna waa baadi cad.

**AAYAD:** Markos 12:29b "Maqal, Israa'iilow, Rabbiga Ilaaheenna ah waa Rabbi keliya."

2. **SU'AAL:** Maxaa loola jeedaa Saddexmidnimada?

**JAWAAB:** Saddexmidnimadu waa eray ka war bixiya sida Eebbe isugu muujiyo Kitaabka Quduuska ah, sida Aabbaha, Wiilka, iyo Ruuxa Quduuska ah.

**AAYAD:** 2 Korintos 13:14 "Nimcada Rabbi Ciise Masiix iyo jacaylka Ilaah iyo wehelmnimada Ruuxa Quduuska ahu kulligiin ha idinla jireen."

3. **SU'AAL:** Maxaad iiga sheegi kartaa Eebbaha Aabbaha ah

**JAWAAB:** Eebbaha Aabbaha ah abuurkiisa aad ayuu u jecel yahay wuxuuna u abuuray dadka in ay isaga caaabudaan oo ay is weheshadaan. Qorshahaas waxaa xumeeyay dembiga; tani waa sababta uu Eebbaha Aabbaha ahi u soo diray Sayid Ciise Masiix oo ah Wiilkiisa keliya ee dhashay si cid kasta oo raacda isaga ay u badbaaddo. Aabbuhu waxaa uu ka mid yahay Seddaxmidnimada Eebbe.

**AAYAD:** Yooxanaa 3:16 "Ilaah intuu dunida jacayl u qabay ayuu siiyey Wiilkiisa keliya oo dhashay in mid kastoo isaga rumaystaa uusan lumin laakiinse uu lahaado nolosha weligeed ah."

4. **SU'AAL:** Wax ma iiga sheegi kartaa Sayid Ciise Masiix?

**JAWAAB:** Sayid Ciise Masiix waa Wiilka Eebbe oo ka mid ah Seddaxmidnimada Eebbe waana Badbaadiyaha dunida wuxuuna ka yimid xagga Eebbaha Aabbaha ah. Wiilku waa Erayga Eebbe ee weligiis jiray iyo Wiilka Aadanaha oo iminka Jannada ku sugan. Wiilku wuxuu ka yimid xagga Jannada.

**AAYAD:** Yooxanaa 20:28 "Toomas ayaa u jawaabay oo ku yidhi, Rabbigay iyo Ilaahayow."

Matoyos 28:19 "Haddaba taga, oo quruumaha oo dhan xer ka dhiga, oo ku baabtiisa magaca Aabbaha iyo Wiilka iyo Ruuxa Quduuskaa."

Luukos 2:11 "Waayo, maanta waxaa magaalada Daa'uud idiinku dhashay Badbaadiye oo ah Masiixa Rabbiga ah."

Matayos 3:17 “oo cod baa samooyinka ka lahaa, Kanu waa Wiilkayga aan jeclahay, oo aan ku faraxsanahay.”

Daanyeel 17:13-14 “Riyadii habeennimada waxaan ku arkay mid u eg wiilkii aadan aha oo ku yimid daruuraha samada, oo wuxuu u yimid, kii da’da weynaa, oo waa loo soo dhoweeyey oo hortiisaa la soo taagay. Oo waxaa la siiyey dowladnimo iyo ammaan iyo boqortooyo, inay dadyowga, iyo quruumaha, iyo kuwa kala afka ahu u wada adeegaan. Dowladnimadiisu waa dowladnimo weligeed jiraysa, oo aan dhammaanayn, boqortooyadiisuna waa mid aan la baabbi’in doonin.”

Yooxanaa 8:23 “Wuxuu ku yidhi iyaga, Idinku waxaad tihiin kuwa hoosta, aniguse waxaan ka mid ahay kuwa sare. Idinku waxaad tihiin kuwa dunidan, aniguse mid kama ihi kuwa dunidan.”

5. **SU’AAL:** Ruuxa Quduuska ah maxaad iiga sheegi kartaa?

**JAWAAB:** Ruuxa Quduuska ahi waa Macalin inna xusuusiya Erayga Eebbe waxaa uuna ka mid yahay Seddaxmidnimada Eebbe. Ruuxa Quduuska ahi waa Eebbe innala jira oo innagu dhex jira

**AAYAD:** Falimaha Rasuullada 5:3a - 4b “Laakiin Butros baa ku yidhi, Ananiyasow, maxaa Shaydaanku qalbigaaga u geliyey inaad Ruuxa Quduuska ah been u sheegtid.... Dad been uma aad sheegin, waxaadse u sheegtay Ilaah.”

Yooxanaa 14:26 “laakiin Gargaaraha Ruuxa Quduuska ah oo Aabbuhu ku soo diri doono magacayga, wax kasta ayuu idin bari doonaa, wuxuuna idin xusuusin doonaa wax kasta oo aan idinku idhi.”

1 Korintos 2:12 “Laakiin innagu ma aynu helin ruuxa dunida laakiinse Ruuxa Ilaah ka yimid, inaynu garanno waxyaalaha uu Ilaah nimco ahaan inoo siiyey.”

6. **SU’AAL:** Astaamaha Eebbe maxaa ka mid ah?

**JAWAAB:** Tilmaamaha Eebbe waxaa ka mid ah in uu yahay jacayl, caadil, quduus iyo deeqsi.

**AAYAD:** 1 Yooxanaa 4:7-8;16 “Gacaliyayaalow, aynu isjeclaanno; waayo, Ilaah baa leh jacaylka; oo mid walba oo jecel, wuxuu ka dhashay Ilaah, Ilaah buuna yaqaan. Oo ka aan jeclaynina Ilaah ma yaqaan; waayo, Ilaah waa jacayl.” “Oo innaguna waan garanaynaa oo waan rumaysan nahay jacaylka Ilaah inoo qabo. Ilaah waa jacayl; oo kii ku sii

jiraa jacaylka, Ilaah buu ku sii jiraa, Ilaahna isaguu ku sii jiraa."

Ishacyaah 61:8 "Waayo, anigoo Rabbiga ahu caddaalad baan jeclahay, waxdhicidda iyo xumaantase waan nebcahay. Si daacad ah ayaan iyaga ugu abaalgudi doonaa, oo waxaan la dhigan doonaa axdi weligiis ah."

7. **SU'AAL:** Yaa abuuray adduunka?

**JAWAAB:** Eebbe ayaa abuuray adduunka.

**AAYAD:** Bilowgii 1:1 "Bilowgii Ilaah samada iyo dhulkuu abuuray." Bilowgii 1:3 "Ilaahna wuxuu yidhi, Iftiin ha ahaado: iftiin baana ahaaday."

8. **SU'AAL:** Eebbe wax kasta miyuu og yahay?

**JAWAAB:** Haa, Eebbe wax kasta waa og yahay.

**AAYAD:** Maahmaahyadii 15:3 "Rabbiga indhihiisu meel kastay jiraan, iyagoo fiirinaya kuwa xun iyo kuwa wanaagsan."

9. **SU'AAL:** Waa kuma Ibliisku?

**JAWAAB:** Ibliisku waa Shaydaan waana caddawga dadka ka leexiya wadada toosan oo ah rabitaanka Eebbe. Ibliisku waa beenaale gudcurka jecel balse neceb iftiinka.

**AAYAD**: 1 Butros 5:8 "Feejignaada oo soo jeeda, waayo, cadowgiinna Ibliiska ahu sida libaax ciyaya ayuu u wareegaa oo u doondoonaa cid uu liqo."

2 Korintos 2:11 "inaan Shayddaan inaga faa'iidaysan, waayo, innagu ma nihin kuwo jaahil ka ah xeeladdiisa.

10. **SU'AAL:** Waa maxaay Kitaabka Quduuska ahi?

**JAWAAB:** Kitaabka Quduuska ahi waa Erayga Eebbe oo waxyi ah oo uu ku caddeeyay rabitaankiisa.

**AAYAD:** 2 Timoteyos 3:16 "Qorniin kastaa wuxuu ku ahaaday Ruuxa Ilaah oo waxtar buu u leeyahay waxbaridda, iyo canaanashada, iyo hagaajinta, iyo edbinta xagga xaqnimada."

11. **SU'AAL:** Kitaabka Quduuska ahi muxuu ka kooban yahay?

**JAWAAB:** Kitaabka Quduuska ahi wuxuu ka kooban yahay Sharcigii nebi Muuse (Towreed), Sabuurkii nebi Daa'uud (Sabuur), iyo Axdiga Cusub (Injiil).

**AAYAD:** 1 Boqoradii 2:3a "Oo Rabbiga Ilaahaaga ahna amarkiisa xaji, si aad jidadkiisa ugu socoto, oo aad u dhowrto qaynuunnadiisa, iyo amarradiisa, iyo xukummadiisa, iyo markhaatifurkiisa, si waafaqsan waxa ku qoran sharciga Muuse...."

Luukos 20:42 "Daa'uud qudhiisa ayaa Kitaabkii Sabuurrada ku leh, Rabbigu wuxuu Sayidkayga ku yidhi, midigtayda fadhiiso."

Yooxanaa 6:45a "Waxaa ku qoran kitaabbadii nebiyada, Kulligood Ilaah baa wax bari doona."

Luukos 24:44 "Wuxuu ku yidhi, Kuwani waa hadalladaydii aan idinkula hadlay intii aan weli idinla jiray. Waa in ay noqdaan wax walba oo sharciga Muuse iyo nebiyadii iyo sabuurrada laygaga qoray oo igu saabsanaa."

12. **SU'AAL:** Yaa qoray Kitaabka Quduuska ah?

**JAWAAB:** Kitaabka Quduuska ah waxaa qoray Eebbe isagoo adeegsanaya dad barakaysan oo quduusiin ah oo uu hoggaaminayay Ruuxa Quduuska ahi.

**AAYAD:** 2 Butros 1:21 "Waayo, wixii nebiyadii sii sheegeen weligood kuma ay iman dadka doonistiisa, laakiinse dad Ruuxa Quduuska ahu waday ayaa xagga Ilaah kaga hadlay."

13. **SU'AAL:** Wax miyaa lagu dari karaa ama laga dhimi karaa Kitaabka Quduuska ah?

**JAWAAB:** Maya! Wax lagu dari karo ama laga dhimi karo Kitaabka Quduuska ahi ma jiraan.

**AAYAD:** Muujintii 22:18 -19 "Oo haddii nin wax ka qaado erayadii kitaabka wax-sii-sheegiddan, isna Ilaah baa qaybtiisa ka qaadi doona geedka nolosha iyo magaalada quduuska ah iyo waxyaalaha kitaabkan ku qoran."

14. **SU'AAL:** Maxaa loola jeeda erayga "Injiil"?

**JAWAAB:** Micnaha "Injiil" waa "War Wanaagsan."

**AAYAD**: Falimaha Rasuullada 13:32 "Oo waxaannu idin keenaynaa war wanaagsan oo ku saabsan ballankii awowayaasheen loo ballanqaaday."

Matayos 9:35 "Ciise wuxuu ku wareegay magaalooyinka iyo tuulooyinka oo dhan, oo sunagogyadooda ayuu wax ku barayay, oo injiilka

boqortooyadii ku wacdiyeyey, oo bugto walba iyo cudur walba ayuu bogsiinayay."

Sunagog waxaa loola jeedaa guryaha cibaadada ee Yuhuudda

15. **SU'AAL:** Eebbe muxuu Aadan ka abuuray?

**JAWAAB:** Eebbe wuxuu Aadan ka abuuray ciidda dhulka.

**AAYAD:** Bilowgii 2:7 "Rabbiga Ilaah ahuna nin buu ka sameeyay ciidda dhulka, dulalka sankiisana wuxuu kaga afuufay neeftii nolosha; ninkiina wuxuu noqday naf nool."

16. **SU'AAL:** Eebbe muxuu ka abuuray Xaawa?

**JAWAAB:** Eebbe Xaawa wuxuu ka abuuray feertii Aadan.

**A AYAD:** Bilowgii 2:21 - 22 "Oo Rabbiga Ilaah ahu hurdo weyn buu ku riday ninkii, kolkaasuu gam'ay; kolkaasuu ka bixiyey feedhiisii middood, meesheediina hilib buu ku awday. Oo feedhii Rabbiga Ilaah ahu ka bixiyey ninka ayuu naag ka sameeyey, oo wuxuu iyadii u keenay ninkii."

17. **SU'AAL:** Eebbe muxuu u abuuray dadka?

**JAWAAB:** Eebbe wuxuu u abuuray dadka in ay isaga sharfaan, weheshadaan, xiriiri la yeeshaan oo ay caabudaan.

**AAYAD:** Ishacyaah 43:7 "Waana mid kasta oo magacayga loogu yeedho, oo aan u uumay sharaftayda aawadeed. Anigaa sameeyey, oo anigaa suubiyey."

2 Korintos 6:18 "Waxaan idiin ahaan doonaa Aabbe, Oo idinkuna waxaad ii ahaan doontaan wiilal iyo gabdho, ayuu Rabbiga Qaadirka ahu leeyahay."

Bilowgii 5:24 "Enoogna Ilaah buu la socday; waana la waayay; maxaa yeelay, Ilaah baa qaatay isagii."

18. **SU'AAL:** Sidee ayaan u sharfi karnaa, u weheshan karnaa, xiriir ula yeelan karnaa una caabudi karnaa Eebbe?

**JAWAAB:** Eebbe waxaan u sharfi karnaa una caabudi karnaa in aan isaga jeclaano oo aan camal wanaagsanna aan la nimaadno.

**AAYAD:** Matayos 5:16 "Sidaas oo kale iftiinkiinnu dadka hortiisa ha iftiimo, si ay shuqulladiinna wanaagsan u arkaan, oo ay Aabbihiinna jannada ku jira u ammaanaan."

Yooxanaa 14:21 “Kii qaynuunnadayda haysta oo xajiya, waa kaas kan i jecel, kan i jecelna Aabbahay waa jeclaan doonaa, anna waan jeclaan doonaa, waana isu muujin doonaa isaga.”

19. **SU’AAL:** Halkee ayey Adan iyo Xaawa ku noolaayeen markii hore?

**JAWAAB:** Adan iyo Xaawa markii hore waxay ku noolaayeen Beer Ceeden.

**AAYAD:** Bilowgii 2:15 -17 “Rabbiga Ilaah ahuna ninkii wuu kaxeeyey oo wuxuu geeyey beer Ceeden inuu falo oo dhawro. Rabbiga Ilaah ahuna wuxuu ninkii ku amray isagoo leh, Geed kasta oo beerta ku yaal; wax baad ka cuni kartaa: laakiin geedka aqoonta wanaagga iyo xumaanta waa inaanad waxba ka cunin: waayo, maalintii aad wax ka cuntid hubaal waad dhiman doontaa.”

20. **SU’AAL:** Muxuu Eebbe uga eryey Aadan iyo Xaawa Beertii Ceeden?

**JAWAAB:** Eebbe wuu ka eryey Aadan iyo Xaawa Beer Ceeden waayo waxay wax ka cuneen geedkii looga digay in aanay waxba ka cunin.

**AAYAD:** Bilowgii 3:6 “Oo markii naagtii aragtay in geedkii cunto ku wanaagsan yahay, oo indhaha u roon yahay, oo uu yahay geed loo doonayo in caqli lagu yeesho, ayey midho ka qaadatay, oo cuntay; ninkeedii la joogayna wax bay ka siisay, oo isagiina wuu cunay.”

21. **SU’AAL:** Waa maxaay dembi?

**JAWAAB:** Dembi waa caasinimo iyo wax kasta oo qilaafsan ammarada Eebbe.

**AAYAD:** 1 Yooxanaa 3:4 “Kii kasta oo dembi falaa wuxuu falaa caasinimo; oo dembigu wuxuu yahay caasinimo.”

Yacquub 4:17 “Haddaba kii garanaya inuu wax wanaagsan sameeyo laakiin aan samayn, dembi bay u tahay isaga.”

22. **SU’AAL:** Ma jiraa qof aan dembi lahayni?

**JAWAAB:** Maya, ma jiro qof aan dembi lahayni.

**AAYAD:** 1 Yooxanaa 1:8 “Haddaynu nidhaahno, Dembi ma lihin, nafsaddeenna ayaynu khiyaanaynaa, oo runtuna inaguma jirto.”

23. **SU’AAL:** Dhib intee la’eg ayaa ka dhashay dembigii Aadan iyo Xaawa iyo keennaba?

**JAWAAB:** Dhammaanteen waxaan ku caasinnay oo aan ka fogaannay

Eebbe waxaana mudan keennu yahay in aan dhimano waayo ciqaabta dembiga ayaa ah dhimasho keliya.

**AAYAD:** Rooma 3:23 "Maxaa yeelay, dhammaan way wada dembaabeen oo gaadhi waayeen ammaanta Ilaah."

Rooma 6:23a "Waayo, mushahaarada dembigu waa dhimashada,..."

**24.** **SU'AAL:** Sayid Ciise Masiix weligiis miyuu dembaabay?

**JAWAAB:** Maya! Sayid Ciise Masiix weligiis ma dembaabin haba yaraatee.

**AAYAD:** Cibraaniyada 4:15b "Laakiin waxaynu leennahay mid [Sayid Ciise Masiix] si walba loo jirrabay sideenna oo kale, oo aan weliba dembi lahayn."

**25.** **SU'AAL:** Eebbe muxuu sammeeyey si uu u sugo badbaadadeenna?

**JAWAAB:** Eebbe, naxariistiisa aawadeed, wuxuu bixiyey qiimihii ama ganaaxii dembigeenna kaddib markii uu soo diray Sayid Ciise Masiix si uu iskutallaabta ugu dhinto dembiyadeenna aawadood.

**AAYAD:** Rooma 5:8 -9 "Laakiinse waa inoo dhintay intaynu weli dembiilayaal ahayn, oo sidaasuu Ilaah jacaylkiisii inoogu muujiyey.

Haddaba haddaynu haatan dhiigiisa xaq ku noqonnay, de si ka baddana isagaynu kaga badbaadi doonnaa cadhada Ilaah."

**26.** **SU'AAL:** Sidee ayaynu ku heli karnaa badbaado?

**JAWAAB:** Waa in aan Sayid Ciise Masiix u rumaynaa in uu yahay Badbaadiyaheenna.

**AAYAD:** Falimaha Rasuullada 16:31a "Kolkaasay ku yidhaahdeen, Rumayso Rabbi Ciise, waadna badbaadi doontaa."

**27.** **SU'AAL:** Maxaa loola jeedaa in aan u rumayno Sayid Ciise Masiix in uu yahay Badbaadiyaheenna?

**JAWAAB:** In aan u rumayno Sayid Ciise Masiix in uu yahay Badbaadiyaheenna waxaa loola jeedaa in aan ka towbad keenno dembiyadeennii hore oo aan isaga keligiis si rasmi ah ugu kalsoonaanno in uu inna siiyo badbaado maaddaama uu yahay Sayidkeenna u dhintay dembiyadeennii kana soo sara kacay kuwii dhintay.

**AAYAD:** Falimaha Rasuullada 3:19a "Haddaba towbad keena oo soo noqda, si dembiyadiinna loo tirtiro..."

Rooma 10:9 -10 "Maxaa yeelay, haddaad afka ka qiratid in Ciise yahay Rabbiga, oo aad qalbiga ka rumaysatid in Ilaah isaga ka sara kiciyey kuwii dhintay, waad badbaadi doontaa, waayo, qalbiga wax baa laga rumaystaa xagga xaqnimada, afkana wax baa laga qirtaa xagga badbaadinta."

28. **SU'AAL:** Badbaadadeenna ma shaqaysan karnaa haddii aan la nimaadno camal wanaagsan?

**JAWAAB:** Maya, badbaadadeenna ma shaqaysan karno haddii aan la nimaadno camal kasta oo wanaagsan. Runtii badbaadadeennu waa deeq Eebbe.

**AAYAD:** Efesos 2:8 - 9 "Waayo, idinku waxaad ku badbaaddeen nimco xagga rumaysadka, mana aha wax xaggiinna ka yimid, laakiinse waa hadiyadda Ilaah, ma aha xagga shuqullada, si aan ninna ugu faanin."

29. **SU'AAL:** Sidee ayaan dembiyadeenna cafis ugu heli karnaa haddaan nahay mu'miniin?

**JAWAAB:** Waa in aan dembiyadeena Eebbe u qirannaa si uu innooga cafiyo.

**AAYAD:** 1 Yooxanaa 1:9 "Haddaynu dembiyadeenna qirano, isagu waa aamin iyo caadil inuu dembiyadeenna inaga cafiyo, oo uu inaga nadiifiyo xaqdarrada oo dhan."

30. **SU'AAL:** Haddii ay badbaadadeenu tahay deeq Eebbe oo nimco ah oo aanan innagu shaqaysan karayn, weli miyaa la inaga doonayaa in aan la nimaadno camal wanaagsan?

**JAWAAB:** Haa, waa in aan la nimaadno camal wanaagsan; inkastoo aanan badbaado ku iibsanayn, haddana, waa miraha iimaanka oo sharfa Eebbe.

**AAYAD:** Yacquub 2:18 "Laakiin waxaa la odhan doonaa, Adigu waxaad leedahay rumaysad, anna waxaan leeyahay shuqullo. I tus rumaysadkaaga aan shuqullada lahayn, anna rumaysadkayga shuqulladaydaan kugu tusi doonaa."

31. **SU'AAL:** Waa maxaay quduusnimo?

**JAWAAB:** Quduusnimadu waa qumanaan iyo toosnaan hadal, niyad iyo camalba leh oo laga doonayo dhammaan Masiixiyiinta oo dhan maaddaama ay yihiin kuwo ku dayanaya Sayid Ciise Masiix.

**AAYAD:** 1 Butros 1:15 -16 "laakiinse siduu kan idiin yeedhay quduuska u yahay, idinkuna sidaas oo kale dabiicaddiinna oo dhan quduus ku ahaada, maxaa yeelay, waxaa qoran, Idinku waa inaad quduus ahaataan."

32. **SU'AAL:** Ruuxa Quduuska ahi muxuu sameeyaa si uu u caawiyo mu'miniinta?

**JAWAAB:** Ruuxa Quduuska ahi wuxuu ku jiraa mu'miniinta si uu u awoodsiiyo in ay nolol quduus ah ugu noolaadaan Sayid Ciise Masiix dartiis.

**AAYAD:** 1 Korintos 3:16 "Miyaanaydin garanaynin inaad tihiin macbudkii Ilaah oo uu Ruuxa Ilaah idinku jiro."

33. **SU'AAL:** Waa maxay salaaddu?

**JAWAAB:** Salaaddu waa la hadlid, dhegaysi iyo la xiriirid Eebbe, ku xamdinaqidiis, iyo caabudiddiisaba.

**AAYAD:** Filiboy 4:6 "Waxba haka welwelina, laakiinse wax kastaba baryadiinna Ilaah ku ogeysiiya tukasho iyo duco mahadnaqid la jirto."

34. **SU'AAL:** Waa maxay kiniisad?

**JAWAAB:** Kiniisaddu waa dadka rumaysan Sayid Ciise Masiix balse ma ahan dhisme meel ku yaal. Arrinkani aad ayuu muhiim u yahay ogaanshihiisu.

**AAYAD:** Efesos 1:22-23 "Wax kastana wuxuu ka hoosaysiiyey cagihiisa, oo wuxuu isaga madax wax kasta ka sarreeyaa uga dhigay kiniisadda, taas oo ah jidhkiisa oo ah buuxidda kan wax kasta meel walba ku buuxiya." 1 Korintos 12:27 "Idinku waxaad tihiin jidhka Masiix iyo xubno ka mid ah."

35. **SU'AAL:** Sidee ayaa kiniisadda Eebbe loo taageeraa?

**JAWAAB:** Kiniisadda Eebbe waxaa taageero u ah hadiyadaha ay bixiyaan xubnaheedu hadba inta ay xubin weliba awooddo.

**AAYAD:** 1 Korintos 16:2a "Maalinta ugu horraysa ee toddobaadka midkiin kastaa meel wax ha dhigo oo ha hayo wixii lagu barwaaqeeyey."

36. **SU'AAL:** Waa maxay baabtiisku?

**JAWAAB:** Baabtiisku waa qirasho laga hor sameeyo dad kale inagoo usheegayna in aan rumaysannay Sayid Ciise Masiix in uu yahay Sayidkeenna kana towbadkeenayna dembiyadeenii. Qofka qirashadan

samaynaya ayaa biyo la maquuriyaa oo misna laga soo saaraa si loo muujiyo in uu Sayid Ciise Masiix la dhintay lana soo sara kacay.

**AAYAD:** Falimaha Rasuullada 8:36 "Kolkay waddada marayeen waxay yimaadeen meel biya leh, bohonkuna wuxuu yidhi, Bal eeg, waa biyo. Maxaa iga celinaya in lay baabtiiso?"

Fallimaha Rasuullada 19:5 "Oo markay waxaas maqleen, waxaa iyagii lagu baabtiisay Rabbi Ciise magiciisa."

**37.** **SU'AAL:** Waa maxay Cashada Sayidku?

**JAWAAB:** Cashada Sayidku waa qaadashada kibista iyo koobka iyadoo lagu xusuusanayo dhimashadii uu Sayid Ciise Masiix innoo dhintay.

**AAYAD:** Luukos 22:19 - 20 "Kibisna wuu qaaday, oo goortuu mahad naqay, ayuu kala jejebiyey, oo iyaga siiyey, isagoo leh. Tanu waa jidhkaygii laydiin bixiyey. Waxan xusuustayda u sameeya. Sidaas oo kale cashada dabadeed koobkuu qaaday isagoo leh, Koobkanu waa axdiga cusub oo dhiiggayga aawadiin loo daadshay."

**38.** **SU'AAL:** Yaa ka qayb qaadan karaya Cashada Sayidka?

**JAWAAB:** Cashada Sayidka waxaa ka qayb qaadan karaya mu'miniinta rumaysatay in Sayid Ciise yahay badbaadiyahooda.

**AAYAD:** 1 Korintos 11:28 - 29 "Nin kastaa ha is-imtixaamo, oo sidaas kibista wax ha uga cuno, oo koobka ha uga cabbo. Waayo, kii cuna oo cabba, xukun ayuu naftiisa u cunaa oo u cabbaa isagoo aan jidhka garanaynin."

**39.** **SU'AAL:** Qof Masiixi ahi ma guursan karaa qof aan Masiixi ahayn?

**JAWAAB:** Maya, qof Masiixi ahi ma guursan karayo qof aan Masiixi ahayn.

**AAYAD:** 2 Korintos 6:14 - 15b "Ha noqonina kuwo ku xidhan kuwo aan rumaysanaynin, waayo, sidee bay xaqnimada iyo dembigu isu weheliyaan, ama sidee bay iftiinka iyo gudcurku isu dhex galaan...ama maxaa ka dhexeeya mid rumaysta iyo mid aan rumaysanaynin."

**40.** **SU'AAL:** Maxay noqon qofkii Masiixi noqdaa laakiinse aan weli qofksii ay is qabeen weli rumaysan Masiixa?

**JAWAAB:** Ninka Masiixiga noqday yaanuu ka tegin xaaskiisa haddii ay doonayso in ay la sii noolaato. Gabadhuna waa sidaas oo kale, haddii ay

Masiixi noqoto ninkeeduna aanuu weli Masiixi noqonin, waa in aanay isaga ka tegin haddii uu doonayo in uu la sii noolaado.

**AAYAD:** 1 Korintos 7:12b - 13 "Hadduu mid walaal ah qabo afo aan rumaysanayn, oo ayna raalli ka tahay inay la joogto, yaanu ka tegin. Oo afadii nin aan rumaysanayni qabo oo isna raalli ka yahay in uu la joogo, yaaney ninkeeda ka tegin."

41. **SU'AAL:** Ka warran haddii xaaska aan Masiixiga noqon uu iskiis isaga tago?

**JAWAAB:** Qofka aan Masiixiga noqoni haddii uu doorto ha iska tago. Qofka Masiixa raacsani taas eed kuma lahan. Qofka Masiixiga ahi ha samro hana ducayso waayo Eebbe ayaa khayr siin.

**AAYAD:** 1 Korintos 7:15 "Laakiin haddii kan aan rumaysanayni tago, ha iska tago. Waxaas oo kale walaalka ama walaashu uma xidhxidhna. Ilaah wuxuu inoogu yeedhay nabad."

42. **SU'AAL:** Faa'iidoyinka guurka maxaa ka mid ah?

**JAWAAB:** Guurku wuxuu ku caawiyaa ninka iyo naagtaba in ay macaasida ka fogaadaan oo daahir ahaadaan. Waxaa kale oo wanaagga guurka ka mid ah in labada is qabtaa isu ahaadaan wehel wanaagsan oo ay is caawiyaan.

**AAYAD:** 1 Korintos 7:2 "Laakiin si aan loo sinaysan, nin kastaa afadiisa oo qudha ha haysto, naag kastaana ninkeeda oo qudha ha haysato."

Bilowgii 2:20-24 "Oo ninkii baa magacyo u bixiyey xoolaha oo dhan, iyo haadda hawada, iyo dugaag kasta oo duurka jooga, laakiin ninkii looma helin mid caawisa oo ku habboon. Oo Rabbiga Ilaah ahu hurdo weyn buu ku riday ninkii, kolkaasuu gam'ay; kolkaasuu wuxuu ka bixiyey feedhihiisii middood, meesheediina hilib buu ku awday. Oo feedhii Rabbiga Ilaah ahu ka bixiyey ninka ayuu naag ka sameeyey, oo wuxuu iyadii u keenay ninkii. Ninkiina wuxuu yidhi, Tanu hadda waa laf ka mid ah lafahayga, iyo hilib ka mid ah hilibkayga: waxaa iyada loogu yeedhi doonaa Naag, maxaa yeelay, iyada waxaa laga soo saaray Nin. Sidaas daraaddeed nin wuxuu ka tegayaa aabbihiis iyo hooyadiis, wuxuuna la joogayaa naagtiisa: oo waxay noqonayaan isku jidh."

43. **SU'AAL:** Guur cayn kee ah ayaa Eebbe ugu talo galay dadka sida ku cad Kitaabkiisa?

**JAWAAB:** Hal nin iyo hal naag oo keliya ayaa Eebbe ugu talo galay in ay is guursadaan. Guurkii kulmiya nin iyo naag ka badanna wuxuu qilaafsan yahay qorshaha Eebbe u dhigay dadka sida ku cad Kitaabkiisa Injiil.

**AAYAD:** Markos 10:7 - 8 "Sababtaas aawadeed nin wuxuu ka tegayaa aabbihiis iyo hooyadiis, wuxuuna la joogayaa naagtiisa. Labaduba waxay noqonayaan isku jidh. Sidaa darteed haatan iyagu laba ma aha, laakiin waa isku jidh."

44. **SU'AAL:** Ninkii isagoo hal xaas ka badan leh noqda Masiixi, miyuu furayaa dhammaan oo uu la harayaa tii ugu horaysay oo keliya?

**JAWAAB:** Maya! Furriinku waa xaaraan Eebbana aad ayuu u neceb yahay. Gogol dhaaf waxaan ka ahayni ma bannayn karayaan furriin.

**AAYAD:** Matayos 5:32 "Laakiin waxaan idinku leeyahay, Mid walba oo naagtiisa furaa sababta sinada aawadeed maahee, wuxuu ka dhigayaa inay sinaysato, oo kii guursadaa tii la furayna waa sinaystaa."

Malaakii 2:16 "Waayo, Rabbiga ah Ilaaha reer binu Israa'iil wuxuu leeyahay, Anigu waan necbahay furidda, oo Rabbiga ciidammadu wuxuu leeyahay, Anigu waan necbahay kii dharkiisa dulmi ku deda, haddaba sidaas daraaddeed iska jira oo khiyaano ha ku macaamiloonina."

45. **SU'AAL:** Jacayl caynkee ah ama intee la'eg ayuu ninku jeclaanayaa xaaskiisa?

**JAWAAB:** Ninku waa in uu xaaskiisaa aad u jeclaadaa una xushmeeyaa oo uu daacadna u ahaadaa.

**AAYAD:** Efesos 5:25 "Nimankow, idinkuna afooyinkiinna u jeclaada siduu Masiixuba u jeclaaday kiniisadda oo uu nafsaddiisii u bixiyey iyada aawadeed."

46. **SU'AAL:** Xaasku sidee ayay ninkeeda u jeclaan kartaa una sharfi kartaa?

**JAWAAB:** Xaasku waa in ninkeeda ay maamuusto oo ay taageertaa si uu reerku u guulaysto.

**AAYAD:** Efesos 5:33 "Habase yeeshee idinka midkiin waluba afadiisa ha u jeclaado sida naftiisa oo kale, oo afaduna ninkeeda ha maamuusto."

47. **SU'AAL:** Sidee ayaa loo dhawri karaa guurka si reerku u liibaano?

**JAWAAB:** Guurka waxaa waajib ah in la dhiso oo la dhawro si uu u guulaysto.

**AAYAD:** Cibraaniyada 13: 4 "Guurka hala wada maamuuso, oo sariirtuna yeynan nijaasoobin, maxaa yeelay, khaniisiinta iyo dhillayadaba Ilaah waa xukumi doonaa."

**48.** **SU'AAL:** Kiniisaddu miyey baabtiisi ninkii leh hal xaas ka badan ee noqda Masiixi?

**JAWAAB:** Haa! Kiniisaddu waa in ay baabtiistaa qof kasta oo noqda Masiixi. Shardiga keliya ee ku xiran baabtiiska waa in uu qofkaasi ahaadaa mid towbad keenay oo rumaystay in Sayid Ciise Masiix yahay Badbaadiyihiisa. In loo diidaa in biyo lagu baabtiiso qof Sayid Ciise Masiix rumaystay waxay noqonaysaa in la caasiyo Sayid Ciise Masiixi oo dhaqan geliyey baabtiiska.

**AAYAD:** Matayos 28:19 "Haddaba taga, oo quruumaha oo dhan xer ka dhiga, oo ku baabtiisa magaca Aabbaha iyo Wiilka, iyo Ruuxa Quduuskaa."

**49.** **SU'AAL:** Kiniisaddu ma u ogolaanaysaa in Masiixi leh hal xaas ka badan uu ka qayb qaato Cashada Sayidka?

**JAWAAB:** Kiniisaddu xaq uma lahan in ay ka hor istaagto qof Masiixi ah in uu ka qayb qaato Cashada Sayidka. Waxa keliya ee ay xaq u leedahay waa in ay u digto mu'min kasta in uu is-imtixaamo isagu bal in uu ka qayb qaadan karayo Cashadaas Sayidka.

**AAYAD:** 1 Korintos 11:28, 31 "Nin kastaa ha is imtixaamo, oo sidaas kibista wax ha uga cuno, oo koobka ha uga cabbo....Laakiin haddaynu innagu dhexdeenna iska xukumi lahayn, laynama xukumeen."

**50.** **SU'AAL:** Kiniisaddu ma howl gelin kartaa mu'min leh hal xaas ka badan kaas oo Eebbe ugu yeeray in uu Sayidka si buuxda ugu adeego?

**JAWAAB:** Haa! Eebbe siyaabo kala duwan ayuu u isticmaali karaa kuwa rumsadka leh balse qaba hal xaas ka badan. Intaas waxaa dheer oo Kitaabku dhigayaa in nin hal xaas ka badan lihi aanuu kiniisadda caawiye ama hoggaamiye ka noqon karin balse waxaa mar walba jiri karaya hawlo kale oo uu qaban karayo xagga kiniisadda.

**AAYAD:** 1 Timoteyos 3:2a "Sidaas daraaddeed hoggaamiyaha

kiniisaddu waa in uu ahaado mid aan ceeb lahayn, oo naag keliya qaba....”

1 Timoteyos 3:12 “Caawiyayaasha kiniisaddu mid kastaahu naag keliya ha guursado, hana noqdeen kuwo si wanaagsan ugu talinaya carruurtooda iyo guryahooda.”

**51.** **SU’AAL:** Maxaa lagu samayn mu’minkii naag labaad guursada isagaa oo hore xaas u lahaa?

**JAWAAB:** Ninkii guursadaa naag labaad ka dib markii uu Masiixi noqday wuxuu gelayaa dembi weyn, wuxuuna qilaafaya qawaaniinta Eebbe ee ku cad Kitaabkiisa. Kiniisaddu waa in ay anshax marisaa ninkan xalaalaystay xaaraanta.

**AAYAD:** 1 Korintos 5:11a, 13b “Laakiin hadda waxaan idiin soo qoray, Ha raacina qof walaal la yidhaahdo hadduu sinaysto, ama wax badan damco....Idinkuse kan sharta leh dhexdiinna ka saara.”

**52.** **SU’AAL:** Kitaabka Quduuska ahi muxuu ka leeyahay macsida?

**JAWAAB:** Kitaabku macsida meel adag ayuu ka taagan yahay waana xaaraan ay tahay in laga fogaado niyad, qawl iyo ficilba.

**AAYAD:** 1 Korintos 6:18 “Ka carara sinada. Dembi kaloo kasta oo nin falo, jidhka waa ka dibadda, laakiin kii dhillanimada falaa jidhkiisuu ku dembaabaa.” Baxniintii 20:14 “Waa inaanad sinaysan.”

Maahmaahdii 6:32 “Kii naag ka sinaystaa wuu caqli daranyahay, Oo kii sidaas yeelaa naftiisuu halligaa.”

Matayos 5:27-28 “Waad maqasheen in la yidhi, Waa inaanad sinaysan. Laakiin waxaan idinku leeyahay, Nin walba oo qof dumar ah damac u eegaa, durba qalbigiisuu kaga sinaystay.

**53.** **SU’AAL:** Kitaabku muxuu ka qabaa balwadaha?

**JAWAAB:** Balwaduhu waa dhaqan xun oo u daran qofka isticmaalaa iyo xigaalkiisaba. Qof kasta jirkiisu waa macbud Eebbe leeyahay waana in la dhawro oo la waxyeelayn.

**AAYAD:** 1 Korintos 6:19-20 “Ama miyaanaydin ogayn jidhkiinnu inuu yahay macbudka Ruuxa Quduuska ah ee idinku jira ee aad Ilaah ka hesheen? Oo idinku isma lihidin, waayo, qiimo weyn baa laydinku soo iibsaday. Sidaa aawadeed Ilaah jidhkiinna ku ammaana.”

Efesos 5:18 "Ha ku sakhraamina khamriga rabshadu ku jirto, laakiinse Ruuxu ha idinka buuxsamo."

54. **SU'AAL:** Kitaabku muxuu ka qabaa furniinka?

**JAWAAB:** Eebbe raali kama ahan furniin waana in Masiixiyiintu ogadaan in ficilkani uu meel adag ka taagan yahay Eebbe.

**AAYAD:** Matayos 19:9a "Waxaan idinku leeyahay, Ku alla kii naagtiisa ku fura wax aan sino ahayn, oo mid kale guursadaa, wuu sinaystaa."

Malaakii 2:16 "Waayo, Rabbiga ah Ilaaha reer binu Israa'iil wuxuu leeyahay, Anigu waan necbahay furidda, oo Rabbiga ciidammadu wuxuu leeyahay, Anigu waan necbahay kii dharkiisa dulmi ku deda, haddaba sidaas daraaddeed iska jira oo khiyaano ha ku macaamiloonina."

55. **SU'AAL:** Maxay tahay xuquuqda waalidku ku leeyihiin caruurtooda?

**JAWAAB:** Eebbe wuxuu caruurta faray in ay waalidkood jeclaadaan, taageeraan una dhega nuglaadaan.

**AAYAD:** Efesos 6:1-3 "Carruurtay, waalidkiinna ku addeeca xagga Rabbiga, waayo, taasu waa qumman tahay. Qaynuunkii kowaad oo ballan la jiraa waa kan, Aabbahaa iyo hooyadaa maamuus inaad nabdoonaatid oo cimrigaagu ku dheeraado dhulka. Aabbayaashow, carruurtiinna ha ka cadhaysiinina, laakiinse waxaad ku korisaan edbinta iyo waanada Rabbiga."

Maahmaahdii 23:22-25 "Dhegayso aabbahaagii ku dhalay, Oo hooyadaana ha quudhsan markay gabowdo. Runta soo iibso, oo ha sii iibin, Oo weliba waxaad ku sii darsataa xigmadda iyo edbinta iyo waxgarashada. Kii xaq ah aabbihiis aad buu u farxi doonaa, Oo kii ilmo caqli leh dhalaana farxad buu ka heli doonaa. Aabbahaa iyo hooyadaaba ha farxeen."

56. **SU'AAL:** Maxay tahay xuquuqda caruurtu ku leedahay waalidka?

**JAWAAB:** Waalidka waxaa la faray in ay caruurtooda daryeelaan una koriyaan si waafaqsan Kitaabka Quduuska ah. Waalidka waxaa laga doonayaa in aysan caruurtooda dhibaatayn oo aysan ciilin.

**AAYAD:** Efesos 6:4 "Aabbayaashow, carruurtiinna ha ka cadhaysiinina, laakiinse waxaad ku korisaan edbinta iyo waanada Rabbiga."

Kolosay 3:21 "Aabbayaashow, carruurtiinna ha ka cadhaysiinina, yeeyan qalbi jabine.

57. **SU'AAL:** Maxay tahay xuquuqda derisku?

**JAWAAB:** Eebbe wuu caddeeyay xuquuqda deriska waana mid aad u weyn.

**AAYAD:** Markos 12:31b "Waa inaad deriskaaga u jeclaataa sida naftaada."

Rooma 15:2 "Midkeen kastaaba deriskiisa ha ka farxiyo inuu ku wanaagsanaado oo ku dhismo."

58. **SU'AAL:** Cafinta muxuu ka yiri Kitaabku?

**JAWAAB:** In aad cidda aad wax ka tirsanayso iska cafiso ayuu Eebbe inna faray

**AAYAD:** Matayos 6:14-15 **"**Waayo, haddaad dadka u cafidaan xumaantooda, Aabbihiinna jannada ku jira ayaa idin cafiyi doona. Laakiin haddaanad dadka cafiyin, Aabbihiinnu xumaantiinna idiin cafiyi maayo."

59. **SU'AAL:** Cadawgayga xitaa ma in aan cafiyo ayuu Eebbe iga doonayaa?

**JAWAAB:** Haa, in aad xitaa cadawgaaga jeclaato oo iska cafiso ayuu dhigayaa Kitaabku.

**AAYAD:** Rooma 12:17-19 "Ninna shar shar ha uga celinina. Ka fikira inaad samaysaan waxa wanaagsan dadka oo dhan hortiisa. Hadday suurtowdo, intaad kartaan, nabad kula jooga dadka oo dhan. Gacaliyayaalow, ha aarsanina, laakiin meel u banneeya cadhada Ilaah, waayo, waxaa qoran, Aarsasho anigaa leh; anaa u abaalmarin, ayaa Rabbigu leeyahay."

Matayos 5:43-44 "Waad maqasheen in la yidhi, Waa inaad deriskaaga jeclaatid oo cadowgaaga necbaatid, laakiin waxaan idinku leeyahay, Cadowyadiinna jeclaada, u duceeya kuwa idin habaara, wax wanaagsan u sameeya kuwa idin neceb, oo Ilaah u barya kuwa idin caaya oo idin silciya."

60. **SU'AAL:** Eebbe miyuu innaga doonayaa in aan deeqsi ahaano?

**JAWAAB:** Haa, Eebbe wuxuu inna farrayaa in aan gacan furnaano af iyo addinba.

**AAYAD:** 1 Yooxanaa 3:17-18 "Laakiin kan leh xoolaha dunidan, oo arka walaalkiis oo baahan, oo qalbigiisa ka xidha, sidee baa jacaylka

Ilaah ugu jiraa isaga? Carruurtaydiiyey, yeynan ku jeclaanin hadalka iyo afka toona, laakiin camalka iyo runta aan ku jeclaanno."

Cibraaniyadda 13:16 "Laakiinse inaad wax wanaagsan fashaan oo wax wada wadaagtaan ha illoobina; waayo, allabaryada caynkaas ah Ilaah aad buu ugu farxaa."

61. **SU'AAL:** Muxuu Eebbe ka yiri in dhaqaale ahaan la teegeero qoyska iyo qaraabada?

**JAWAAB:** Eebbe wuxuu inna faray in aan geed dheer iyo mid gaabanba u fuulno sidii aan dhaqale ahaan u taageeri lahayn qoyska iyo qaraabada. Dayacaadda reerka iyo qaraabo goysnimadu waa dembi weyn.

**AAYAD:** 1 Timoteyos 5:8 "Laakiin qof hadduusan dadkiisa dhaqaalayn, khusuusan kuwa gurigiisa jooga, kaasu iimaankuu ka hor yimid, wuuna ka sii liitaa mid aan rumaysanayn."

62. **SU'AAL:** Sideen u bixinnaa sadaqada ama deeqda?

**JAWAAB:** Waa in aan wax bixino innaga oo ku faraxsan oo mahadnaqayna.

**AAYAD**: 2 Korintos 9:7 "Qof kastaa wax ha u bixiyo siduu qalbiga ka goostay, oo yaanu ku bixin caloolxumo ama qasab, waayo, Ilaah wuxuu jecel yahay kan farxad wax ku bixiya."

63. **SU'AAL:** Masiixiga wanaagsan ee ehelka u ah Eebbe ka cabsiga maxaa lagu gartaa?

**JAWAAB:** Qofka wanaagsan ee dahirka ah ee Eebbe ku xiran waxaa laga arkaa miraha Ruuxa.

**AAYAD:** Galatiya 5:22-23 "Laakiin midhaha Ruuxu waa jacayl, farxad, nabad, dulqaadasho, roonaan, wanaag, aaminnimo, qabownimo, iscelin; waxa caynkaas ah sharci ka gees ahu ma jiro."

64. **SU'AAL:** Ma suurtagal baa in la ahaado Masiixi wanaagsan balse aan laguugu cadaadin caqiidadaada ama aan siyaabo kale aan laguu silicin sababo la xiriira quduusnaantaada?

**JAWAAB:** Maya! Dad badan oo aan Eebbe ku xirnayn ayaa af iyo addinba kuu muujinaya nacayb marba haddii aad ku nooshahay nolol Eebbe raali ka yahay. Ceeb malahan in laguu dhibaateeyo caqiidadaada wanaagsan balse adigu dhib laga fogaan karo ha ku doonan gacmahaaga.

**AAYAD:** 2Timoteyos 3:12 “Runtii, kulli inta doonaysa inay si cibaado leh Ciise Masiix ugu noolaadaan waa la silcin doonaa.”

**65.** **SU’AAL:** Soon iyo salaad caynkee ah ayuu Eebbe raali ka yahay?

**JAWAAB:** Eebbe ma jecla salaad iyo soon is tus tus ah oo dadka looga doonayo in ay kugu amaanaan. Cibaado wanaagsan waa midda u dhaxaysa Eebbe iyo qofka cibaadaysanaya oo aan dano kale laga lahayn.

**AAYAD:** Matayos 6:5-6 **“**Oo goortaad tukanaysaan, ha ahaanina sida labawejiilayaasha, waayo, waxay jecel yihiin inay tukadaan iyagoo taagan sunagogyada iyo meesha jidadku isku gooyaan si ay dadka ugu muuqdaan. Runtii waxaan idinku leeyahay, Abaalgudkoodii way heleen. Laakiin adigu goortaad tukanaysid, qolkaaga qarsoon gal, oo goortaad albaabkaaga xidhid, Aabbahaaga meesha qarsoon ku jira bari, oo Aabbahaaga waxa qarsoon arka ayaa kuu abaalgudi doona.”

Matayos 6:16-18 “Kolkaad soontaan ha ahaanina sida labawejiilayaashu u fool qulubsan yihiin, waayo, way isfoolxumeeyaan si ay dadka ugu muuqdaan inay sooman yihiin. Runtii waxaan idinku leeyahay, Abaalgudkoodii way heleen. Laakiin adigu goortaad soontid, madaxaaga saliid marso oo fool dhaqo, si aadan dadka ugu muuqan inaad sooman tahay, laakiin aad ugu muuqatid Aabbahaaga meel qarsoon ku jira, oo Aabbahaaga waxa qarsoon arkaa waa kuu abaalgudi doonaa.”

**66.** **SU’AAL:** Eebbe muxuu dadka ka abuuray?

**JAWAAB:** Eebbe wuxuu dadka ka abuuray isaga u ekaanshihiisa. Dadka oo dhami waxay mudan yihiin xushmad iyo qadarin.

**AAYAD:** Bilowgii 1:27 “Oo Ilaah nin buu ka abuuray araggiisa, Ilaah araggiisa ayuu ka abuuray isaga; lab iyo dhaddig ayuu abuuray.

**67.** **SU’AAL:** Waa maxay towbad sideesa ayay wax tar u leedahay?

**JAWAAB:** Towbadu waa in aan qirano dembigeena innaga oo Eebbe cafis waydiisanayna. Waxaa kale oo loo baahan yahay in aan demigeena u qirano dadka aan ku xadgudubno si aan cafis uga helno.

**AAYAD:** 1 Yooxanaa 1:9 “Haddaynu dembiyadeenna qiranno, isagu waa aamin iyo caaddil inuu dembiyadeenna inaga cafiyo, oo uu inaga nadiifiyo xaqdarrada oo dhan.”

Maahmaahyadii 28:13 “Kii xadgudubyadiisa qariyaa ma liibaani doono, Laakiinse kii qirta oo haddana ka tagaa, naxariis buu heli doonaa.”

68. **SU'AAL:** Kitaabku muxuu ka leeyahay shaqada?

**JAWAAB:** Kitaabku wuxuu dadka farayaa in ay shaqaystaan waayo shaqo ayaa sharaf leh. Ma shaqaystenimadu waxay dhaawac gaar ah ku tahay qofka waxayna dhib guud ku tahay bulshada. Masiixiyiintu waa in ay todobaadkiiba shaqeeyaan lix maalin oo ay maalinta todobaad nastaan Eebbana la caabudaan Masiixiyiinta kale.

**AAYAD:** 2 Tesaloniika 3:10 "Waayo, xataa markaannu idinla joognay, waxaannu idinku amarnay, Mid hadduusan doonayn inuu shaqeeyo yuusan waxba cunin**."**

Baxniintii 20:9 "Lix maalmood waa inaad hawshootaa, oo aad shuqulkaaga oo dhan qabsataa."

69. **SU'AAL:** Eebbe muxuu ka yiri beenta?

**JAWAAB:** Beentu waa xaaraan waana dembi mana ahan dhaqan wanaagsan. Waa in aan runta sheegno waayo beenaale waa dembiile wuuna ceebaysan yahay.

**AAYAD:** Kolosay 3:9 "Been ha isu sheegina, waayo, idinku waad iska xoorteen dabiicaddii hore iyo falimaheediiba."

Maahmaahyadii 12:22 "Bushimaha beenta sheega Rabbigu wuu karhaa. Laakiinse kuwa runta ku shaqeeya wuu ku farxaa."

70. **SU'AAL:** Ma culimada oo keliya ayay tahay in ay diinta faafiyeen mise Masiixiyiinta oo dhan ayaa taas laga doonayaa?

**JAWAAB:** Xerta oo dhan ayaa laga doonayaa in ay Injiilka faafiyaan waayo rumaysadka Sayid Ciise Masiix waa lagu badbaadaa.

**AAYAD:** Markos 16:15 "Markaasuu wuxuu iyaga ku yidhi, Dunida oo dhan taga, oo uunka oo dhan injiilka ku wacdiya."

1Butros 3:15 **"**Rabbiga Masiixa ah qalbiyadiinna quduus kaga dhiga, oo mar kasta diyaar u ahaada inaad u jawaabtaan nin alla ninkii wax idinka weyddiiya sabab ku saabsan rajada aad leedihiin, laakiinse qabow iyo cabsi ugu jawaaba."

71. **SU'AAL:** Xaggee ayuu haatan ku sugan yahay Sayid Ciise Masiix?

**JAWAAB:** Sayid Ciise Masiix haatan jannada ayuu ku sugan yahay.

**AAYAD:** 1 Butros 3:22 "Ciise Masiix jannaduu galay oo wuxuu joogaa gacanta midig oo Ilaah, oo malaa'igaha iyo kuwa amarka leh iyo kuwa xoogga leh oo dhanba waa laga hoosaysiiyey isaga."

72. **SU'AAL:** Maxay dadku mudan geerida kadib?

**JAWAAB:** Dadka badbaaday waxay mudan janno iyo weheshiga Eebbe balse kuwa Eebbe diiday waa kuwo khasaaray waxayna mudan ciqaab weyn.

**AAYAD:** Daanyeel 12:2 "Oo qaar badan oo ku hurda ciidda dhulka ayaa soo toosi doona, qaarkood waxay u soo toosi doonaan nolol weligeed ah, qaarkoodna waxay u soo toosi doonaan ceeb iyo quudhsasho weligeed ah."

Falimaha Rasuullada 24:15 "Oo waxaan xagga Ilaah ka rajaynayaa waxyaalaha ay kuwan qudhooduba filanayaan, waana inay jiri doonto sarakicidda ay kuwa xaqa ah iyo kuwa aan xaqa ahayn soo sara kici doonaan."

Matayos 25:46 "Kuwanuna waxay geli doonaan taqsiirta weligeed ah, kuwa xaqa ahuse waxay geli doonaan nolosha weligeed ah.

73. **SU'AAL:** Waa maxay janno?

**JAWAAB:** Jannadu waa meel kaamil ah oo loo diyaariyey kuwa badbaaday si ay Eebbe u weheshadaan weligood.

**AAYAD:** Muujintii 21:27 "Oo gudaheedana sinaba uma ay geli doonaan wax nijaas ah amase kii sameeya karaahiyo iyo been, laakiinse waxaa keliyahoo geli doona kuwa ku qoran kitaabka nolosha ee Wanka."

74. **SU'AAL:** Waa maxay naartu?

**JAWAAB:** Naartu waa meel leh ciqaab weligeed ah oo loo diyaariyay kuwa aan badbaadin ee diiday rumaysadka Eebbe.

**AAYAD:** Matayos 25:41 "Markaasuu kuwa bidixdiisa jooga ku odhan doonaa, Kuwa yahow inkaaranu, iga taga oo gala dabka weligiis ah kan Ibliiska iyo malaa'igihiisa loo diyaargareeyey."

75. **SU'AAL:** Sidee ayay Masiixiyiintu ku noqdeen caruurtii Eebbe?

**JAWAAB:** Eebbe ayaa doortay in kuwa isaga rumaysani oo dhan ay noqdaan isaga caruurtiisa. Arrintan ayaa ku timid jacaylka uu Eebbe u qabo dadkiisa isaga raacsan. Tani waxay caddayn u tahay in Eebbe doonayo in uu dadkiisa xiriir iyo is weheshi la yeesho.

**AAYAD:** 1 John 3:1 "Bal ogaada siduu yahay jacaylka Aabbuhu ina siiyey, taasoo ah in laynoogu yeedho carruurta Ilaah, oo saasaynu nahay.

Sidaa aawadeed dunidu ina garan mayso, maxaa yeelay, isagaba ma ay garanaynin."

Yooxanaa 1:12 "Laakiin in alla intii aqbashay, wuxuu siiyey amar ay carruurtii Ilaah ku noqdaan, kuwaasu waa kuwii magiciisa rumaystay."

Rooma 8:17 "Oo haddaynu carruur nahay, de haddaba waxaynu nahay kuwo wax dhaxla, kuwo Ilaah dhaxla oo Masiix wax la dhaxla, haddii aynu isaga la xanuunsanno, in laynala ammaano isaga."

**76.** **SU'AAL:** Waa maxaay nuxurka Tobanka Amar ee Eebbe?

**JAWAAB:** Tobankaas Amar waxaa uu Eebbe ku soo koobay in isaga iyo deriskaba la jeclaado.

**AAYAD:** Matayos 22:37- 40 "Kolkaasuu ku yidhi isaga, Waa inaad Rabbiga Ilaahaaga ah ka jeclaataa qalbigaaga oo dhan iyo naftaada oo dhan iyo caqligaaga oo dhan. Kanu waa qaynuunka ugu weyn oo ugu horreeya. Ku labaad oo u ekina waa kan. Waa inaad deriskaaga u jeclaataa sida naftaada. Sharcigii oo dhan iyo nebiyadiiba waxay sudhan yihiin labadan qaynuun."

**77.** **SU'AAL:** Sayid Ciise Masiix miyuu soo laaban doonaa?

**JAWAAB:** Haa! Runtii wuu soo laaban doonaa si uu dunida u xukumo.

**AAYAD:** Matayos 24:30 "Markaasaa waxaa cirka ka soo muuqan doona calaamada Wiilka Aadanaha, markaas ayaa qolooyinka dhulka oo dhammu barooran doonaan, oo waxay arki doonaan Wiilka Aadanaha oo daruuraha cirka ku imanaya isagoo leh xoog iyo ammaan weyn." "Wiilka Aadanaha" waa magac uu Sayid Ciise Masiix isku tilmaami jiray

**78.** **SU'AAL:** Goormee ayuu Sayid Ciise Masiix soo laabana doonaa?

**JAWAAB:** Eebbe nooma sheegin xilli go'an oo uu soo laabanayo balse waa hubaal soo laabashadiisu.

**AAYAD:** Markos 13:32-33 "Laakiin maalintaas iyo saacaddaas ninna waxba kama oga, malaa'igaha jannada ku jira iyo Wiilka toona, midna ma oga, Aabbaha keliya maahee. Iska jira oo soo jeeda, waayo, ma ogidin wakhtigu goortuu yahay."

**79.** **SU'AAL:** Sayid Ciise Masiix muxuu samayn doonaa marka uu soo laabto?

**JAWAAB:** Ciise Masiix dadka ayuu kala xisaabin doonaa marka uu soo laabto si cid waliba u hesho camalkeeda ku salaysan addeecidda ama addeecid la'aanta Eebbe. Kuwa Eebbe raacsani way liibaani doonaan oo kuwa diidayna way hoogi doonaan.

**AAYAD: Matayos 25:31-46 "Goort**ii Wiilka Aadanahu ammaantiisa ku yimaado, isaga iyo malaa'igaha oo dhan, markaasuu carshiga ammaantiisa ku fadhiisan doonaa. Quruumaha oo dhan ayaa hortiisa lagu soo ururin doonaa oo wuxuu u kala sooci doonaa mid mid sida adhijirku u kala sooco idaha iyo riyaha. Idaha wuxuu joojin doonaa midigtiisa, riyahana bidixdiisa. Markaasaa Boqorku kuwa midigtiisa jooga ku odhan doonaa, Kaalaya, kuwa Aabbahay barakeeyeyow, oo dhaxla boqortooyada tan iyo aasaaskii dunida laydiin diyaargareeyey. Waayo, waan gaajooday oo cuntaad i siiseen, waan harraadsanaa oo waad i waraabiseen, qariib baan ahaa oo waad i soo dhoweeyseen, waan qaawanaa oo dhar baad i huwiseen, waan bukay oo waad i soo booqateen, xabsi baan ku jiray oo waad ii timaadeen. Markaasaa kuwa xaqa ahu u jawaabi doonaan iyagoo leh, Sayidow, goormaannu ku aragnay adigoo gaajaysan oo aannu cunto ku siinnay, ama adigoo harraadsan oo aannu ku waraabinnay? Goormaannu ku aragnay adigoo qariib ah oo aannu ku soo dhowaynay ama adigoo qaawan oo aannu wax ku huwinnay? Goormaannu ku aragnay adigoo buka ama adigoo xabsi ku jira oo aannu kuu nimid? Markaasaa Boqorkii u jawaabi doonaa oo ku odhan doonaa, Runtii waxaan idinku leeyahay, In alla intaad u samayseen mid ka mid ah walaalahaygan u yaryar, waad ii samayseen. Markaasuu kuwa bidixdiisa jooga ku odhan doonaa, Kuwa yahow inkaaranu, iga taga oo gala dabka weligiis ah kan Ibliiska iyo malaa'igihiisa loo diyaargareeyey. Waayo, waan gaajooday, cuntona ima aydnaan siin, waan harraadsanaa, imana aydnaan waraabin. Qariib baan ahaa, imana aydnaan soo dhowayn, waan qaawanaa, dharna ima aydnaan huwin, waanan bukay oo xabsi ku jiray oo ima aydnaan soo booqan. Iyaguna markaasay u jawaabi doonaan oo ku odhan doonaan, Sayidow, goormaannu ku aragnay adigoo gaajaysan ama harraadsan ama qariib ah ama qaawan ama buka ama xabsi ku jira oo aannu ku kalmayn weyney? Markaasuu u jawaabi doonaa oo ku odhan doonaa, Runtii waxaan idinku leeyahay, In alla intaad u samayn weydeen mid

ka mid ah kuwan u yaryar, anigana waad ii samayn weydeen. Kuwanuna waxay geli doonaan taqsiirta weligeed ah, kuwa xaqa ahuse waxay geli doonaan nolosha weligeed ah."

80. **SU'AAL:** Sidee ayaan isugu diyaarin karaa soo laabashada Sayid Ciise Masiix?

**JAWAAB:** Waxaad isugu diyaarin kartaa in aad xertiisa ka mid ahaato si uu kuu garto kuuguna farxo marka aad kulantaan; waayo xiligaas wuxuu ku joojin doonaa isaga midigtiisa. Kuwa lumay ayuu Masiixu joojin doonaa isaga bidixdiisa.

**AAYAD:** Matayos 25:31-46 – Eeg aayadahaas ku xusan xagga sare.

81. **SU'AAL:** Calaamado caynkee ah ayaa muuqan doona marka soo laabashada Sayid Ciise Masiix soo dhawdahay?

**JAWAAB:** Calaamadaha waxaa ka mid ah welwel, cabsi iyo guux badan oo dadku dhibsadaan. Marka uu soo laabto ayaan ogaan doonnaa in uu soo laabtay!

**AAYAD:** Luukos 21:25 "Calaamooyin ayaa laga arki doonaa qorraxda, iyo dayaxa, iyo xiddigaha; dhulkana waxaa ku jiri doona dhib quruumahu ka welwelaan guuxa badda iyo hirarka aawadood."

Matayos 24:3-13 "Oo goortuu Buur Saytuun fadhiistay, xertii ayaa keli ahaan ugu timid oo waxay ku yidhaahdeen, Noo sheeg, Goormay waxyaalahanu ahaan doonaan, oo calaamada imaatinkaaga iyo dhammaadka wakhtiga dunidu maxay ahaan doontaa? Ciise ayaa u jawaabay oo wuxuu ku yidhi, Iska eega yaan laydin khiyaanayn. Waayo, qaar badan ayaa magacayga ku iman doona, oo waxay odhan doonaan, Anigu waxaan ahay Masiixa, oo qaar badan ayay khiyaanayn doonaan. Oo waxaad maqli doontaan dagaallo iyo dagaallo hadalhayntood. Iska jira, hana baqanina, waayo, waxaasu waa inay dhacaan, laakiin dhammaadku weli weeye. Waayo, quruunba quruun bay ku kici doontaa, boqortooyona boqortooyo, oo waxaa meelo kala duwan ka dhici doona abaaro iyo dhulgariir. Waxan oo dhammu waa bilowga hoogagga. Markaasaa dhib laydiin gaysan doonaa, waana laydin dili doonaa, oo magacayga aawadiis ayaa quruumaha oo dhammi idiin nebcaan doonaan. Maarkaas qaar badan ayaa xumaan doona, midba mid buu gacangelin doonaa, weyna isnebcaan doonaan. Waxaa kici doona nebiyo badan oo

been ah, oo qaar badan ayay khiyaanayn doonaan. Dembigu waa badnaan doonaa, taa aawadeed qaar badan jacaylkoodu waa yaraan doonaa. Laakiin kii adkaysta ilaa ugu dambaysta, kaasaa badbaadi doona."

Matayos 24:26-27 "Haddaba hadday idinku yidhaahdaan, Bal eega, wuxuu joogaa cidlada, ha u bixina. Bal eega, wuxuu joogaa qolalka qarsoon, ha rumaysanina. Waayo, sida hillaacu bari uga yimaado oo u ifiyo galbeed, sidaas oo kale ayaa imaatinka Wiilka Aadanahu ahaan doonaa."

# QAYBTA 2aad

## Tix iyo Tusmo

# UUNKA WADA GAARA

Ma ogtahay Masiixii markuu
samada aadaayey
Ma ogtahay inuu yiri ammar oo dhan aa
aniga ley siiyey?
Ma ogtahay xertii in uu ku yiri
uunka wada gaara?
Ma ogtahay xer ka dhiguuna yiri
aadanoo idile?
Ma ogtahay baabtiisuuna yiri
markey aamminaane?
Ma ogtahay Seddaxmidnimadaa
la isku baabtiisi?
Ma ogtahay addeeciddaa la bari
iney adkeeyaane?
Ma ogtahay inuu yiri anaa
idinla sii joogi?
Ma ogtahay addeeceen warkii
Eebbahood faraye?
Ma ogtahay adduunkoo dhan buu
gaarey Eraygiiye?
Ma ogtahay aniba iigu yimi
aqalki aan iilley?
Ma ogtahay waxaan kula rabaa
inaad ogaataaye?
Ma ogtahay iftiin yaad ka heli
idil ahaantiise?
Ma ogtahay Masiixood akhbasho
arrinta koowaad ah?
Ma ogtahay ummaddood bartana
ammar cad weeyaane?

# INJIIL

Ma ogtahay Injiilkeennu waa
Eray Ilaaheeye?
Ma ogtahay inaan lana bedelin
uu yahay sidiisi?
Ma ogtahay Ilaah baana yiri
dhowra Eraygeyga?
Ma ogtahay inaan yeelnayoo
taaban Eraygiisa?
Ma ogtahay awood inuu ka heli
kii adkeeyaana?
Ma ogtahay iftiin inuu yahay
nuursha illinkiisa?
Ma ogtahay miro ruuxiyaa
uunku ka arkaaye?
Ma ogtahay adduunkuu ku heli
Eebbe wuxuu siiyo?
Ma ogtahay abaal marin sugyoo
Aakhiruu heliye?
Ma ogtahay ilmeyn maayo oo
wuu ilka caddeyne?
Ma ogtahay akhbaarkaas inuu
dhigayo Injiilku?
Ma ogtahay la'aantiis iney
dunidu aafoobi?
Ma ogtahay inuu yahay dawada
aadanuhu doono?
Ma ogtahay inaan kula jeclahay
inaad horuu doonto?
Ma ogtahay aaya maleh ninkii
diida Eray Eebbe?

# BARAKEYSAN

Ma ogtahay barakeysan kuwa
aan is booxaarin?
Ma ogtahay boqortooyada Jannadaa
gacanta loo buuxin
Ma ogtahay barakeysan kuwaa
laga baroorsiiyo?
Ma ogtahay Baaxad-soorahaa
bishaaradood siine?
Ma ogtahay barakeysan kuwaan
camal la buubeynin?
Ma ogtahay barwaaqada dhulkey
dhaxli banaankaase?
Ma ogtahay barakeysan kuwa
xaqnimo u baahan?
Ma ogtahay baashaal iney
uurka buuxsanina?
Ma ogtahay barakeysan kuwa
naxariista badan?
Ma ogtahay berigooda yaa
boorka laga qaadi?
Ma ogtahay barakeysan  kuwaan
uurku bahaloobin?
Ma ogtahay berri inuu Ilaah
baro u dheerayni?
Ma ogtahay barakeyan kuwaa
nabadda beeraaya?
Ma ogtahay barbaartaa inuu
Eebbe ballan siiyey?
Ma ogtahay barakeysan kuwaa
beenta lagu maago?
Ma ogtahay Boqortooyada Jannadey
baarax u dabaalan?

Ma ogtahay barakeysan kuwaa
Masiixa loo beylin?
Ma ogtahay abaal marin badan
iyaga loo buurye?

## TOWBAD

Ma ogtahay towbad xumidey
tamiday Soomaali?
Ma ogtahay iney taag dhigeen
talana ay seegtay?
Ma ogtahay tol aan u tureyn
yey tixgeliyaane?
Ma ogtahay tubtii Eebbehood
saa uga talaabe?
Ma ogtahay ma toobsadaan haddaad
talo u taaneyso?
Ma ogtahay Injiil tows ridaa
diide taladiise?
Ma ogtahay Masiix taah tiraa
diide tusmadiise?
Ma ogtahay tumaatida ku dhici
taaheedaba mooge?
Ma ogtahay taarik iney yihiin
toosinin salaadda?
Ma ogtahay haddey tiicayaan
talo xumaantoode?
Ma ogtahay tab iyo xeelad ma leh
tu' ay ku faadi ?
Ma ogtahay Masiixey tartiib
taladiis yeelaanna
Ma ogtahay Injiilkey si toosa
ugu tixnaadaana

Ma ogtahay haddey towbad keen
aaney wada taabin?
Ma ogtahay tacabkood khasaar
tobanya dhowr jeere?

## JAAHILAA LUMAY

Ma ogtahay Jaamacow ninkii
jaahilaa lumaye?
Ma ogtahay jaxiimaan ka baqi
inuu u jiitaaye?
Ma ogtahay jikraarkiyo wuxuu
eedi jirribaadda?
Ma ogtahay xigaaliyo juffuu
Jidka ka doortaaye?
Ma ogtahay wuxuu jantaba
xaqa ma jiibeeyo?
Ma ogtahay jabkiisana ma oga
jiirku marayaaye?
Ma ogatahay jar inuu ka dhici
aanuu uba jeedaynin?
Ma ogtahay kuwaa jerinayoo
oo u jiir nixina
Ma ogtahay inuu juuq u oran
hadal ha joogteena?
Ma ogtahay jalfis kuwuu dhiguu
jaal u heystaaye?
Ma ogtahay jilbiskaa diluu
jaarigiis yahaye?
Ma ogtahay jise laawahaas
jimicii diidaaya
Ma ogtahay janno inuu jahdaa
jiinka laga waaye?

Ma ogtahay jameecada Masiix
hadduu u soo jeesan
Ma ogtahay dhegna jalaq hadduu
jeerna u siineynin
Ma ogtahay Injiilkaa Jabbaar
hadduu u soo joogsan
Ma ogtahay Jaliil inuu jaaseyn
yaa u jiri doonta?

## QUDUUSNIMO

Ma ogtahay Ilaah Qaaddirkeen
waa wada quduuse?
Ma ogtahay quduusnimuuna faray
kii qira iimmaanka?
Ma ogtahay qof aan quduus ahayn
Qaaddir arkimeyse?
Ma ogtahay quduus  haddii la noqon
qodobaa jira e?
Ma ogtahay Masiixood qirtaa
qodobka koowaad ah?
Ma ogtahay Qaaddirna waa inaad
qaab u jeclaataaye?
Ma ogtahay Qaaddir kale ma jiro
waa inaad qirtaaye?
Ma ogtahay qodob kalena waa
qaddari deriskaaga?
Ma ogtahay qisa kalaan rabaa
inaan kuu qunshaaye?
Ma ogtahay qummanaantu  waa
qiime saa'idahe?
Ma ogtahay qurun laga haraa
qabarku noo sheegay?

Ma ogtahay qaab u socodka xumi
waa qar soo dumiye?
Ma ogtahay qadaf lama rabee
waa leys qurxiyaaye?
Ma ogtahay qushuuc waa sedee
qoomamadaa ceeba?
Ma ogtahay qiyaamaa jirtoo
Qaaddir loo tegiye?

## XOG WARRAN

Ma ogtahay Soomaaliyey
sidaan idiin dooni?
Ma ogtahay sumad inaad tihiin
suran sedrigeyga?
Ma ogtahay sinnaba inaad
igaga suuleynin?
Ma ogtahay in leydin siroo
siriq leydiin daadshey?
Ma ogtahay in leydinku sugay
sebiyo waayeelna?
Ma ogtahay surunkaad heysaan
Saciiruu tagaaye?
Ma ogtahay  Dariiqii sugnaa
leydinka sii jeedi?
Ma ogtahay siyaasadey ahayd
seddaxda ilaahe?
Ma ogtahay sideedaba inaan
Saaddir qura leennay?
Ma ogtahay siniyo faaxishaba
Sayidku noo diidye?
Ma ogtahay sed weeyee inaan
oognana salaadda?

Ma ogtahay soonkana inaan
saani u adkeyno?
Ma ogtahay saddaqada waan
siinnaa ehelkeede?
Ma ogtahay sulux in aan nahoo
nabadda aan soorro
Ma ogtahay  jannana inuu ka sabri
Sayidka kii diida?

## CAJABAYEY!

Ma ogtahay Cali in aan  ku iri
Caaddil war aqoonso?
Ma ogtahay in uu ciil qabtoo
carana ay saaqday?
Ma ogtahay caqli in aan u iri
war cowdibileyso?
Ma ogtahay cajabeyey uu yiri
Casiis waan aqaanaa?
Ma ogtahay cibaaradu waa
Ciisaha ad diidday?
Ma ogtahay Ciise inuu uun yahay
nebi Caaddil doortay?
Ma ogtahay Ciise nebi ka weyn
cilladdu waa taase?
Ma ogtahay cid kama aanan maqal
casharka kaagaahe?
Ma ogtahay inaan Ciise dabdii
Caaddil nebi dirin?
Ma ogtahay codxumidaadu iney
ciiddu ay giriiri?
Ma ogtahay cagahaaga yaa dhaama
caqligaaga?

Ma ogtahay cilaaqtanku ma ahan
camal gobaadeede?
Ma ogtahay cagahaaga yaa
Casiis ka cabsoodey?
Ma ogtahay caqligeyguna
Caaddil wuu yaqaannaa?
Ma ogtahay caammaa luntaye
culimo liibaantay?
Ma ogtahay caqiido san inaan
anigu ceyneynin?
Ma ogtahay Ciisaa kaaga filan
culeys ku haayoo dhan?
Ma ogtahay cishadanaan rabaa
Ciise in aan raaco?
Ma ogtahay Casiis waaxidaa
culay ad laabtaada?
Ma ogtahay cidaheygi yaa
cabsi igu haaya?
Ma ogtahay haddey Ciise rabaan
cidi ma hor joogto?

## FAA'IIDO MA LEH

Ma ogtahay Faaraxow fudeyd
laguma faa'iido
Ma ogtahay fagfagtuna ka daran
furuqa faafaaye?
Ma ogtahay falkastoo ad fali
labaa la fiirshaaye?
Ma ogtahay fiig baa ku xigi
fara fudeyd baase?
Ma ogtahay facaa raaca waa
lagu fidnoobaaye?

Ma ogtahay faduusha xaqaa
laga fogaadaaye?
Ma ogtahay filfilid laguma helo
fered Ilaaheeye?
Ma ogtahay nin falan oo quraa
Eebbe isku fiiqa?
Ma ogtahay Fataax Eraygiisa
laguna faayaaye?
Ma ogtahay fiqiyadiisa yaa
laga faa'iidaaye?
Ma ogtahay Fardowsey ku geyn
faalada toodaa he?
Ma ogtahay fool adeyg ka roon
fulaynimo jaane?
Ma ogtahay faral weeye inaad
Ciise fadlan raacdo?
Ma ogtahay Injiilkeyna faray
Fiqiga raaciise?
Ma ogtahay famil hadduu ku noco
Fataaxaad leedahay?

## LA'EED

Ma ogtahay Kulmiyow la'eed
kalaamka beentaahe?
Ma ogtahay wuxuu kaa geeyaa
keli Ilaaheeye?
Ma ogtahay kurbuu kugu ridaa
kaaga sii darane?
Ma ogtahay karaamaadna ma leh
kaan iska ilaalin?
Ma ogtahay kibir yaa dabeed
kurku la dheeraane?

Ma ogtahay wuxuu kaa celshaa
kalaam Ilaaheeye?
Ma ogtahay Injiikuu ku oran
waa ku aan jirine?
Ma ogtahay Masiixana kol buu
kuugu dhigi hoose?
Ma ogtahay kalaamkaas beentaahi
waaba karantiine?
Ma ogtahay ninkuu kaamil helo
kuuste gebigiiye?
Ma ogtahay Kiniisadda Alluu
kaaga digayaaye?
Ma ogtahay Kitaab kuu ku oran
kii horeba maahan?
Ma ogtahay sheydaankaa ka dhigan
kobuu ka soo duulo?
Ma ogtahay inkastoon ka digay
kallifka uu keeno
Ma ogtahay kumanaan ka badan
kuwaan i yeeleyne?

## LARUURO

Ma ogtahay lillaahiye iney
lumeyso Soomaali?
Ma ogtahay luggooyaa la baday
lala diciifaaye?
Ma ogtahay libtoodi lunsheen
labiyo dhowr jeere?
Ma ogtahay laayacaa ku dhacay
iney liciifeenna?
Ma ogtahay laqbadi loo akhriyey
lalabkey eedeene?

Ma ogtahay lakabkii haddaa
daawa loo helaye?
Ma ogtahay laruuradoodu waa
Injiilkey liideene?
Ma ogtahay lurkaba waxaa ka bi'in
akhrinta Luukoose?
Ma ogtahay ma luudeen haddey
xaqa u laabtaane?
Ma ogtahay leyli bexe haddii
Masiixa loo geeyo?
Ma ogtahay luuqyada kuma heysteen
laqama sheydaane?
Ma ogtahay bannaan lagu nastey
layrsan lahaayeene?
Ma ogtahay laabtoodu wey
liibaani lahayde?
Ma ogtahay luufkaa ka hari
luri calooshooda?
Ma ogtahay inuu laxaw ka hari
laqdaba diideene?
Ma ogtahay laacib iney noqon
jannada loo diidin?

## RUNLOW

Ma ogtahay Quduuska ayaa
maamula adduunke?
Ma ogtahay awood yey ka heli
kulli Masiixiyiintu?
Ma ogtahay Maryan ku abuur
mirihii Masiixa?
Ma ogtahay dembigii ka dhana
marna lama dhaafe?

Ma ogtahay Runlow in la yiraa
magaca kiisaaba?
Ma ogtahay haddiyaduu baxshaa
Macalinkaa weyne?
Ma ogtahay midkii aan lahayn
ma ahan Masiixe?
Ma ogtahay mira ruuxiyuu
siiyaa mu'miniinta
Ma ogtahay jacayl yaa ka mida
miraha uu siiyo?
Ma ogtahay farxad yaa ka mida
miraha uu siiyo?
Ma ogtahay dulqaadashaa ka mida
miraha uu siiyo?
Ma ogtahay nabad yaa ka mida
miraha uu siiyo?
Ma ogtahay roonaan yaa ka mida
miraha uu siyo?
Ma ogtahay wanaag yaa ka mida
miraha uu siiyo?
Ma ogtahay aamminimaa ka mida
miraha uu siiyo?
Ma ogtahay qabow yaa ka mida
miraha uu siiyo?
Ma ogtahay is celin yaa ka mida
miraha uu siiyo?

## YIMID MASIIXII

Ma ogtahay mar hore inuu
yimid Masiixeenni?
Ma ogtahay mooradii ku dhallay
Maryanoo bikraahe?

Ma ogtahay maxab kama uu helin
magaaladiisiiye?
Ma ogtahay jannuu mudan hayaa
uunka kii maqlaba?
Ma ogtahay cadaab inuu ku dhici
kii diida Masiixa?
Ma ogtahay in la muday oo
macatab la saarey?
Ma ogtahay in uu noo dhintoo
meyray dembigeenni?
Ma ogtahay in la aasay uu
galay mugdigaasna?
Ma ogtahay inuu sara kacay
seddax maalin ka dib?
Ma ogtahay inuu tegay Samada
Mowlana la joogo?
Ma ogtahay in uu imanayuu
maamulina uunka?

## BADBAADO

Ma ogtahay badbaaduu baxshaa
Macalinka weyne?
Ma ogtahay Injiilkaad ka heli
macnahoo idile?
Ma ogtahay towbad keen ayaa
marinka kuu toosin?
Ma ogtahay janniyo naari waa
midkaad doorataaye?
Ma ogtahay camal suubban waa
mire Masiixeede?
Ma ogtahay waa haddiyad Alloo
muruq shaqeynayne?

Ma ogtahay masala gaabku eed
muranka beentaahe?
Ma ogtahay mushriknimnadu waa
ma hadho sheydaane
Ma ogtahay madax adeygu waa
marin ciriiryoone?
Ma ogtahay runtoo la wajahaa
marna la hureyne?
Ma ogtahay ab ka gaarku waa
marin habow jaane?
Ma ogtahay badbaado waxaad ku heli
Masiixood raacdaaye?

## MARKII HORE

Ma ogtahay markii hore Ilaah
samaduu meegaarey?
Ma ogtahay arladana inuu
mudeyna tiirkeeda?
Ma ogtahay adduunyada mugdiyo
muuq xumaa helaye?
Ma ogtahay iftiin yaa Ilaah
maamuus ugu miisey?
Ma ogtahay iftiinkiyo mugdigi
meel ku kala oodye?
Ma ogtahay biyihii Ilaah
meel isugu geeye?
Ma ogtahay Macbuud inuu markaa
bad ku magaacabay?
Ma ogtahay dhulkii soo haraan
miro ku beernaaye?
Ma ogtahay Ilaahey badduu
mallaay ku abuuray?

Ma ogtahay Macbuudkeen jeclaa
muuqa quruxdiiye?
Ma ogtahay Ilaahey ku yiri
wada mataaneeya?
Ma ogtahay Ilaah yaa dhulkana
duunyo ku manneystay?
Ma ogtahay Aadan yuu kolkaa
uummay Mowlaheenu?
Ma ogtahay Aadan feertii buu
marwo uga yeelay?
Ma ogtahay Aadan iyo Xaawana
muuqiis ka abuurye?
Ma ogtahay jannadii iney
macandi heysteena?
Ma ogtahay mirihii cuneen
laga mabnuucaayey?
Ma ogtahay laga saar jannadey
maalku ku heysteenna?
Ma ogtahay Mowle waa caaddil
maalin iyo leyle?

## WAR MIISAAN LEH

Ma ogtahay Masiixi noqo
Mowliid inaan iri?
Ma ogtahay inuu yiri meeqaa
maal la i siinaayaa?
Ma ogtahay inaan iri maal
Mowlaa laga tuugaa?
Ma ogtahay Masiixiyaddu
maaley bixisaaye?
Ma ogtahay ma iibsanno dadkee
macnuhu waa kaase?

Ma ogtahay malyuun oon ley siin
noqon maa Masiixi?
Ma ogtahay diintaad heysataa
maal yaa kugu siiya?
Ma ogtahay abkey ka gaaroo
mushaar layma siiyo?
Ma ogtahay adiyo abkaa
Mowlow tegaysaane?
Ma ogtahay Fardowsaan ka sugi
Mowlihii abuurtay?
Ma ogtahay Masiixii dafire
malahan liibaane?
Ma ogtahay middaasaan geleyn
aniga maankeyga?
Ma ogtahay Masiixoo quraa
Mowle loo maraaye?
Ma ogtahay ma aan maqal warkaa
maantadan horteede?
Ma ogtahay xujaa daahirtoo
maqashay maantaane?
Ma ogtahay caddeyn male innaba
miinkaad tirineyso?
Ma ogtahay Injiilkaa dhigaa
Mowle hadalkiisa?
Ma ogtahay Injiilkii lunyoo
maanta lama haayo?
Ma ogtahay inuu saaran yahay
aniga miiskeyga?
Ma ogtahay haddey sidaa ay tahay
waa mucjiso weyne?
Ma ogtahay Masiixood qirtaa
mucjiso kaleetaa?
Ma ogtahay anigoo odayaa
leygu maadsaniye?

Ma ogtahay mushrikiintu abid
maage mu'miniinta?
Ma ogtahay war  miisaan le yaad
maanta iila timid?
Ma ogtahay haddii taa ad garan
waa mahad Ilaahe?
Ma ogtahay halley maagabee
aqbal Masiixiiye?
Ma ogtahay ku mootiyey Ilaah
marin cadaabeedki?
Ma ogtahay Ilaah mahad lehoo
mu'min iga yeelye?
Ma ogtahay Ilaah wuu hadaa
maskaxdi doontaaye?

## NASIIB MA LEH

Ma ogtahay nasiib male ninkii
diida nebi Ciise?
Ma ogtahay in ay naaqus tahay
diintuu nasri  moodo?
Ma ogtahay nuurkii Ilaah
diidyey oo nacyaye?
Ma ogtahay nasteexo Eebbihiis
naafo ka jeclaaye?
Ma ogtahay Nasaaradi Ilaah
diidyey nabaddiiye?
Ma ogtahay necbaayoo ka fiig
nimco Ilaaheeye?
Ma ogtahay naxli lagu lumuu
nacamta haayaaye?
Ma ogtahay nibiri raacyayoo
nacyey Ilaaheeye?
Ma ogtahay nacasnimo yuu

nacabkii doortaaye?
Ma ogtahay naftiisii u dhiib
ma naxe sheydaane?
Ma ogtahay naqii diidyey iyo
nolol gobaadeede?
Ma ogtahay nararacdiisa yaa
naarna u horseedi?
Ma ogtahay nasab sheegashaa
nabara gaarsiine?
Ma ogtahay neecawdi janno
deyri noloshaase?
Ma ogtahay nabsaa helahayoo
xaquu naqtiimaaya?

## ADI WANAAGAAGA

Ma ogtahay walaalow inaan
wacdi an kuu haayo?
Ma ogtahay warkeyguna waa
adi wanaagaaye?
Ma ogtahay waanadeydu waa
xaqood ad weydaaran?
Ma ogtahay weedh aan la hubin
Waaxid oran maaye?
Ma ogtahay nin waalin yaa yiraa
Injiilku waa beene?
Ma ogtahay wadada sami waa
Masiixood weyneyso?
Ma ogtahay weligaa inaad
innaba waareynin?
Ma ogtahay wed baa jira dila
waleysya waayeele?
Ma ogtahay Waaxid yaa dabeed

loo wada tegaaye?
Ma ogtahay waxaad geysataa
waa lagu horkeeni?
Ma ogtahay walaalow haddaad
heysataa wakhtiye?
Ma ogtahay waxaa kula gudboon
Waddadood soo raacdo?
Ma ogtahay Injiil waxaan ahayn
waa lagu lumaaye?
Ma ogtahay ninkii waxgaradaan
diidin weedheeye?
Ma ogtahay waa towbad qura
waxaan ku weydiine?

# GUNAANAD

*Aasaaska Diinteenna* waa buug xambaarsan cilmi badan kaas oo bilaya caqiidada Masiixiyiinta. Waxaa kale oo buuggan ka faa'iidaysan karaya dadka xiisaynaya caqiidada Masiixiyadda. Haddii ad tahay mid rumaysan Sayidka ama mid iminka baadigoobaya Rabbiga, waxaa hubaal ah in aad cilmi badan kala kulantay buuggan. Nuxurka buuggan ha noqdo mid dadka tusiya waxa dhab ahaan uu yahay Injiilka iyo xigmadaha badan oo uu xambaarsan yahay.

Waxaan si gooniya ugu ducaynayaa akhristayaasha buuggan ee aan Masiixiyiinta ahayn in Eebbe siiyo hanuunkiisa kuna hoggaamiyo wadada saxda ah kana fogeeyo baadinimo oo dhan. Waxaa kale oo aan iyana si kal iyo laab ah ugu ducaynayaa Masiixiyiinta akhristay buuggan in Eebbe ku sugo kuna xoojiyo iimaanka Sayid Ciise Masiix. Waxaan Eebbe ka baryayaa in cilmiga ku qoran buuggan uu gaarsiiyo dhammaan daafaha adduunka hadba meesha ay ku sugan yihiin dadka Soomaaliyeed ee harraadka u qaba Sayid Ciise Masiix.

Waxaan si weyn ugu mahadnaqayaa dadka kala jooga goobaha kala fogfog ee buuggan akhriyay, hubiyay, saxay, ama si kaleba kor ugu qaaday tayadiisa. Dhammaantiin waxaan leeyahay waad mahadsan tihiin Eebbana ajar iyo xasanaad ha idinka siiyo sida aad ugu hagar baxdeen tayaynta buuggan. Buuggan ma ahaadeen mid dhamaystiran haddii aadan igu caawiseen shaqal tirkiisa. Wixii gaabis ah ee buuggan lagu arko aniga ah qoraha ayaa si buuxda uga masuul ah oo eeddaas cidi ilama lahan.

Guul iyo gobanimo

**Aweis A. Ali**

## About the author

Rev. Aweis A. Ali (BTh., MDiv., PhD - candidate) is a missiologist and a student of the history of the Somali Church. Aweis is a former house-church pastor, worship leader and evangelist; he has been in ministry since 1993. Aweis currently oversees the work of his denomination in the Horn of Africa.



Maandeeq Publishing

ISBN: 978-9914-700-42-8

9 789914 700428